WAXA LOO BAAHAN YAHAY IN AAD KA OGAATO



ONTARIO GUDAHEEDA

Buugyarahan waxaa ku qoran macluumaad ku saabsan sharciga oo u qoran siduu ahaa wakhtigii la soo qoray. Sharcigu waa isbeddeli karaa. Ka baar macluumaad casriyaysan shabakadda Wasaaradda Xeer-Ilaaliyaha Guud (Ministry of the Attorney General) ee **www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca** . Buugyarahan kuma jirto talo sharciyeed mana beddelaayo talada xirfadaysan ee qareennada ama khubarooyin kale

ISBN 978-1-4249-8370-4 (PDF)

Tani waa tarjumiddii Waxa Loo Baahan Yahay Inaad Ka Ogaato Xeerka Qoyska Ontario Gudaheeda (What You Should Know About Family Law in Ontario), dib-u-habaynti March 2006.

Waxa Loo Baahan Yahay Inaad Ka Ogaato Xeerka Qoyska Ontario Gudaheeda (What You Should Know About Family Law in Ontario) waxaa Kaloo lagu heli karaa Ingiriis, Faransiis iyo luqado kale.

Buugyarahan waxaa xataa lagu heli karaa afka faransiiska .

Waxaa soo daabacday Wasaaradda-Xeer Ilaaliyaha Guud (Ministry of the Attorney General).

Daabacaaddii koowaad ee buugyarahan waxaa qayb ka maalgelisay Waaxda Caddaaladda Canada (Department of Justice Canada).

August 1999
March 2002
Dib loo habeeyay March 2006

Buug yarahan dhexdiisa.....

Hordhac.....2

I. **Waxyaabaha Aad U baahan Tahay in Aad Ka Ogaato Xeerka Qoyska**.....6

Aqal galka.....6

Wada noolaanshaha.....6

Kala saaridda iyo xallinta arrimaha idinka dhaxeeya.....9

U tagidda dhexdhexaadiye…..11

U tagidda garqaade... ….13

Xulashada qareen.....14

Aadista maxkamadda.....16

Sidii Aad U Heli La'hayd

Furitaan.....18

II. **Xuquuqahaaga Sharciga iyo waajibaadkaaga**.....19

Joogista hoyga qoyska.....19

Daryeelista carruurtaada.....20

Carruurtaada taageeristooda dhaqaale.....24

Taageerista dhaqaale ee saygaaga/xaaskaaga.....29

Fulinta bixinta masruufka.....31

Kala qeybinta hantidiinna.....35

Kala qeybinta hantida marka uu/ay geeriyoodo/geeriyooto seygaaga ama xaaskaaga.....44

III. **Gacan ka hadal qoys ka dhex dhaca**……47

Sharciyada dhibbaneyaasha lagu xadgudbay.....49

IV. **Helidda macluumaad dheeraad ah arrimaha dadka assal ahaan ka so jeedaan dhulkan...**.....54

Hordhac

Buug yarahan wuxuu ku saabsan yahay xeerka qoyska ee Gobolka Ontario. Wuxuuna ka kooban yahay macluumaad ku saabsan sharciyo laga yaabo in ay ku saameeyaan haddii aad xaaskaaga/seygaaga kala tagtaan (separate) . Xaaladahan waxaa ka mid ah daryeelka iyo taageeridda carruurtaada, taageeriddaada iyo tan saygaaga/xaaskaaga iyo kala qeybinta hantidiinna.[1]

Ka hor inta aadan gaarin go'aan muhiim ah, waa in aad fahamtaa xuquuqdaada iyo waajibaadyadaada. Xeerka qoyska wuxuu noqon karaa mid adag buug yarana kaaga ma jawaabi karo su'aalahaaga oo dhan kuumana sheegi karo wax kasta ee aad u baahan tahay in aad ogaato. Waxaa jira dariiqyo badan oo aad naftaada ku wargelin karto arrinta ku saabsan sharciga iyo fursadahaaga oo aad wax ku kala dooran karto. Guud ahaan xeerka qoyska ee Ontario wuxuu si siman u qabtaa kuwa is qaba oo isku jinsi ah ama kala jinsi duwan.

Haddii aad kala tagteen ama aad ku fekereyso in aad kala tagtaan, waxaa fikrad wanaagsan ah in aad qareen kala hadasho xaaladdaada. Qareenku wuxuu ku siin karaa macluumaad gaar ah oo ku saabsan sharciga wuxuuna kuu sheegi karaa sida laga yaabo in uu kuu saameeyo.

Sidoo kale maxkamadda qoyska ee degmadaada ayaa ah meesha ugu wanaagsan oo aad u aadi karto in aad ka hesho macluumaad dheeri ah. Maxkamadaha qaarkood waxay bixiyaan kulammo macluumaad siin ah oo ay siyaan waalidiinta ay saameyneyso in ay kala tagaan. Dhammaan maxkamadaha qoyska waxay leeyihiin Xarummo Macluumaad ee Sharciga Qoyska (Family Law Information Centres) kuwasoo bixiya macluumaad iyo adeegyo kala duwan, oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

- buuggaag yar yar iyo waxyaabo kale ee qoraal ah ee la xiriira mowduucyo ku saabsan qoysaska kala tagaya;
- Tilmaamaha hannaanka;
- U-tilmaamidda adeegyada laga helo jaaliyadda dhexdeeda, sida la talinta;
- Macluumaad ku saabsan hannaanka maxkamadda iyo foomamka maxkamadda;

- Macluumaad iyo talo ku saabsan dariiqyada kala duwan ee loo xalliyo

[1] Macluumaadka ku qoran buug yarahan ee la xiriira qeybinta hantida iyo canshuurta masruufka waxaa laga yabaa in aysan ku quseyn haddii adiga tahay (Indian) ka diiwaan gashan *Xeerka Indianka* ee Federaalka. Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa buug yarahan dhabarkiisa.

Boggaga 11, 13 iyo 58

muranka sharciga qoyska oo uu ku jiro dhexdhexaadin, garqaadid, wada shaqeynta xeerka qoyska iyo aadidda maxkamadda; iyo
- macluumaadka sharciga iyo talo aad ka hesho qareennada gargaarka sharciyeed (legal aid) kuwaasoo aqoon u leh xeerka qoyska.

Ontario waxaa ka jira sedex maxkamaddood oo kala duwan oo quseeya xeerka qoyska.

Jaaliyadaha qaarkood, arrimaha ku saabsan xeerka qoyska waxaa lala macaamilaa **Maxkamadda Qoyska ee Maxkamadda Sare ee Cadaaladda (Family Court of the Superior Court of Justice)**. Maxkamadahan waxay la macaamili karaan dhammaan arrimaha quseeya xeerka qoyska, oo ay ku jirto furriinka, xannaaneynta, haysashada carruurtaa, kala qeybinta hantida, sharciga korsashada iyo ilaalinta ubadka. Sidoo kale maxkamadahan waxay kaloo ay leeyihiin Xarummo Macluumaadka Xeerka Qoyska waxayna u fidiyaan shacabka adeegyada dhexdhexaadinta qoyska iyo macluumaad waalidka.

Jaaliyado kale, xaaladdaha xeerka qoyska waxaa lala macaamilaa laba maxkamadood oo goonni ah. Waxaad u baahan tahay in aad ogaato midda la macaamili karto arrinta xeerka qoyska ee adiga aad u baahan tahay in aad xalliso:

- Haddii furriin kaliya aad u baahan tahay, ama haddii aad dooneyso in aad furriin hesho oo aadna dooneysid xannaaneyn, haysashada ama masruuf ee qayb ka ah furriinka, waa in aad aaddaa **Maxkamadda Sare ee Cadaaladda (Superior Court of Justice)**. Sidoo kale waa in aad aaddaa maxkamaddan haddii aad dooneysid in aad xalliso arrimaha la xiriira kala qeybinta hantida qoyskaaga.

- Haddii aad furriin raadineyn, balse taageero kaliya aad u baahan tahay, ama aad dooneysid in aad xalliso arrimo la xiriira xannaaneynta ama helitaanka caruurtaada, waxaad aadi kartaa Maxkamadda Sare ee Cadaaladda, balse sidoo kale waxaad aadi kartaa **Maxkamadda Cadaaladda ee Ontario.** Sidoo kale maxkamaddan waxay dhegeysataa arrimaha la xiriira korsashada cunug iyo ilaalada caruurta.

Adiga iyo saygaaga/xaaskaaga sidoo kale waxaad xallin kartaan arrimaha idin dhex yaala idinka oo u maraya in si gaar ah loo maslaxeeyo, wada hadal dhexdhexaadin, heshiisiin ama idinka oo maxkamadda wada aada. Buug yarahan wuxuu soo bandhigayaa qaar macluumaad ah oo ku saabsan mid ka mid ah dalabyadan.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan maxkamaddaha qoyska iyo adeegyada iyo meelaha aad wici karto ama u qori karto si aad caawinaad u hesho, fadlan ka raadi qeybta "Helidda macluumaad dheeraad ah" ee bogga 66.

Bogga 66

I. Waxyaabaha Aad Ubaahan Tahay in Aad Ka Ogaato Xeerka Qoyska

Aqal galka

Ontario gudaheeda, labada qof waxay isku mehersan karaan meher mas'uul dowlad soo jeediyo ama mid diineed.

Markaad guursato, sharcigu wuxuu guurkaaga u tixgeliyaa sida iskaashi dhaqaale oo siman. Haddii guurkaaga uu dhammaaddo, qiimaha hantida ee aad kasbatey inta aad is wada qabteen iyo kororka qiimaha hantida ee aad lahayd marka guurku uu dhacay oo kororka nus ayaa loo qeybin doonaa, hal nus adiga ayaa iska leh nuska kalena seygaaga ama xaaskaaga ayaa iska leh. Waxaa jira waxyaabo aanan quseyn xeerkan.

Bogga 19

Sidoo kale sharciga wuxuu adiga iyo seygaaga ama xaaskaaga idin siinayaa xuquuq siman oo aad guriga kuwada joogtaan.

Haddii aad kala go'daan, waa in aad go'aammisaan qofka guriga ku sii noolaan doonaa.

Boggaga 24 iyo 29

Intaa waxaa dheer, xeerarka qoyska ee Ontario waxa kale ee uu bixiyaa oo laga yaabaa in aad xaq u yeelato taageero dhaqaale oo uu siiyo adiga ama caruurtaada goorta guurkaaga uu dhamaado.

Lammaanayaasha ee dareensan in sharciga uusan ku habbooneyn nooca xiriir ee ay leeyihiin waxay sameyn karaan qorshe kale oo ay ku darayaan **heshiiska guurka.**

Heshiiska guurka waa dokumentiyo sharci oo aad muhiim u ah. Waa in aad si taxadar leh uga fekirtaa go'aankaaga. Qareen la hadal oo is weydaarsada macluumaad dhaqaale ka hor inta heshiiska guurka aadan saxiixin.

Heshiiska guurka waxaad ku sheegi kartaan waxa uu qofba qofka kale uu ka filanaayo inta aad is wada qabtaan. Waxaad ku qori kartaan hantida uu qof kasta uu la imaanayo markaad is guursaneysaan sheegaayana qiimaha inta uu joogo iyo qofka iska lehba. Waxaad xaqiiqo ku oran kartaa sida aadhantidaada u qeybin doonto.
haddii guurkaaga uu dhamaado. Ma ahan in hantidaada aad u qeybiso si siman. Waxaad ku tilmaami kartaa sida taageeridda lacagta loo bixin doono haddii guurkaaaga uu dhamaado. Sidoo kale waxaad qorshooyin u sameyn kartaa waxbarasho iyo diinta aad ku barbaarin lahayd caruurtaada, xitaa haddii aysan ciyaalku weli dhalan.

Waxaa jira waxyaabo aadan ku qori karin heshiiskaaga guurka. Ma sameyn kartid balanqaadyo ku saabsan xannaaneynta si aad ku heli lahayd caruurtaada haddii aad kala tagtaan. Waxba kama badeli kartid sharciga oranaya in xaas iyo say ay guryahooda ay ugu noolaan karaan si xaq ah oo siman.

S ***Hore ayaan isu qabnaa oo ma lihin heshiis guur. Waxaan u maleyneynaa in aan mid yeelano hadda ay tahay fikrad fiican. Ma goor dambe baa?***

J Maya, oo ma ahan goor dambe. Heshiiska guurka waad saxiixi kartaan markaad isguursataan ka dib. Xusuusnow waa in uu ahaadaa mid qoran oo aad adiga iyo saygaaga/xaaskaaga ku hor saxiixdaan markhaati hortiisa markhaatiga waxaa sidoo kale looga baahan yahay in uu saxiixo heshiiska. Haddii idinku aad iska qorataan heshiiska, mid kiinaba waxaa looga baahan yahay in uu qareenkiisa tusiyo si qareenka u arko ka hor inta aadan saxiixin heshiiska.

S ***Waxaan aqal galayaa billooyin gudahood. Wax badan ma haysto balse waxaan heystaa/leeyahay maacuun hooyadeyda la siiyey goorta ay aqal galeysey. Qiimaha maacuunta qiyaas ahaantii waa $2,000. Goorta aan guursado, maacuunta ma waxay noqoneysaa mid seygeygu ila leeyahay?***

J Maya. Maacuunta waa hantidaada. Haddii guurkaaga dhamaado, maacuunta adiga ayaa sii haysan karaaya. Balse haddii qiimaha maacuunta ay sii korodhey goorta uu guurkiina dhammaadey, adiga iyo saygaaga/xaaskaaga ayaa wadaagi doona qiimaha ku kordhey maacuunta.

Haddii aad haysato heshiis guur, wuxuu oran karaa in maacuunta ay tahay hantidaada oo qiimo kasta haddii ay ku kordhaan maacuunta inta aad is qabtaan haddii guurka dhamaado saygaaga/xaaskaaga ma wadaageysaan wixii ku kordhay.

Wada noolaanshaha

Haddii aad qof wada nooshihiin idinka oo aanan isqabin, dadku waxay yiraahdaan in aad ku wada jirtaan **xiriir sharciy ee caadi (common law relationship)** ama **aad wada nooshihiin.**

Hanti

Lammaanayaasha ku wada nool xeerka caadiga ma lahan xuquuqda ay leeyihiin lammaanayaasha is qaba oo ay ku wadaagaan hantida ay soo wada iibsadeen goorta ay wada noolaayeen. Caadiyan, sida saabaanta, waxyaabaha guryaha la dhigto iyo hantida kale oo shaqsiga soo gatey uu leeyahay. Lammaanayaasha Xeerka Caadiga iskula nool sidoo kale xaq uma laha in ay wada qeybsadaan hantida ku korortay waxayaabaha ay soo keensadeen inta xiriirku uu socday.

Haddii aad wax ku darsatey hantida uu leeyahay/ay leedahay saygaaga/xaaskaaga, waxaa laga yaabaa in aad qeyb xaq ku leedahay. Aysan ka ahayn haddii qofka aad jaalka tihiin ku heshiisaan in dib uu kaa siiyo/ay kaa siiso, waa in aad maxkamadda aadaa oo aad caddeysaa inta aad ku dartey.

Taageero

Haddii uu dhamaado xiiriirka xeerka caadiga (common law relationship), oo aadan haysan lacag kugu filan oo aad ku taageerto noloshaada, waxaad qofka aad jaalka tihiin weydiin kartaa in uu masaruuf ku siiyo. Adiga ayaa taageero dhaqaale weydiisan kara haddii aad seddex sanadood wada degganeydeen, ama haddii aad wada degganeydeen muddo intaa ka yar aadna leedihiin cunug aad dhasheen ama korsateen. Haddii qofka aad jaalka tihiin yiraahdo maya, maxkamadda ayaad aadi kartaa oo garsooraha ayaad weydiisan kartaa in uu go'aammiyo haddii taageero dhaqaale ay tahay in aad heli karto.

Haddii adiga iyo qofka aad jaalka tihiin aad leedihiin cunug ama aad wada korsaneysaan, taageero dhaqaale ee cunugaas ayaad weydiisan kartaa. Caruurta ay waalidiintooda ay iskula nool yihiin xiriirka xeerka caadiga (common law relationship) xuquuq siman ayey u leeyihiin in ay waalidiindooda ka helaan taageero dhaqaale sida caruurta waalidiinta is qaba oo kale. Haddii qofka aad jaalka tihiin inta aad wada nooleydeen cunuggaaga ula macaamilaayey sida cunuggiisa, sidoo kale waxaad weydiisan kartaa taageero dhaqaale. Haddii qofka aad jaalka tihiin uusan bixin doonin taageero dhaqaale, maxkamadda ayaad aadi kartaa oo garsoore ayaad waxaad weydiin kartaa in uu qofka aad jaalka tihiin ku amro in masruuf cunugaas la siiyo. Caddadka masruuf waxaa lagu dejiyay **Xeerka Masruufka Ilmaha.**

Qeyb ka mid ah Taageeridda dhaqaale ee lagu amrey in la siiyo adiga ama cunugaaga, sidoo kale waxaad weydiisan kartaa in aad sii joogto guriga aad qeybsaneyseen inta aad wada nooleydeen. Garsooraha ayaa tani amar ku bixin kara xitaa haddii aadan guriga iska lahayn, ama haddii magacaagu uusan ku qorneyn heshiiska kirada. Tani way ka duwan tahay marka loo eego laba qof ee is qaba. Labada qof ee is qaba xuquuq siman ayay leeyihiin in ay guriga joogaan.

Haddii masaruuf aadan helin, xaq uma lihid in aad guriga joogto haddii adiga aadan lahayn guriga.

Lammaaneyaasha ku wada jira xiriirka xeerka caadiga waxay saxiixi karaan **heshiiska wada-noolaanshaha** si ay u ilaashadaan xuquuqdooda.

Heshiiska wada-noolaanshaha waxaa lagu qori karaa waxa aad labadiinnaba dooneysaan habaynta maalkiinna iyo qoyskiinnaba sida ay noqon lahaayeen. Wuxuu sheegi karaa yaa iska leh waxyaabaha la iibiyey inta aad wada nooleydeyn. Wuxuu sheegi karaa inta taageero dhaqaale la bixin doono haddii xiiriirku uu dhamaado iyo sida hantidaada loo qeybin doono. Wuxuu sheegi karaa ayaa looga baahan yahay in uu guuro haddii xiriirka uu dhamaado.

Ma sheegi karo ayaa yeelan doona in uu xannaaneysto, ama heli karo caruurtaada haddii xiriirkaaga uu dhamaado. Tani ma go’aammin kartid xiriirka inta uusan dhammaan ka hor.

Labadiinnaba waa in aad heshiiska wada-noolaanshaha si uu u sharciyeysmo aad markhaati hortiisa ku hor saxiixdaan. Markhaatiga xitaa waa in uu saxiixaa heshiiska. Mar alla markii aad saxiixdaan heshiiska wada-noolaanshaha, waa in aad raacdaan waxa uu sheegaayo. Haddii midkiin uu go’aansado inuu an jecleyn heshiiska, waad ku gor-gortami kartaan beddelid heshiiska. Isbedel kasta xataa waa in uu ahaadaa mid qoraal ah oona lagu saxiixo markhaati hortiisa. Haddii aad ku heshiin weydaan, oo aadna hadda kala tagteen, waa in aad maxkamadda aadaan oo garsoorka weydiisataan in wax laga beddelo.

Midkiinba waa in aad qareen kala duwan la hadashaan oo aad isweydarsataan macluumaadka dhaqaalaha ka hor inta aadan saxiixin heshiiska wada-noolaanshaha.

S ***Waan wada nool nahay mana lihin heshiiska wada-noolaanshaha. Maxaa ku dhici doona waxyaabaha aan leennahay iyo kaydkeenna haddii midkeenna uu geeriyoodo?***

J Haddii aad geeriyooto iyadoo uu dardaaran kuu qorneyn kaasoo oranaya sida aad dooneysid in hantidaada laga yeelo, hantidaada waxay aadi doontaa ehellada aad dhiig wadaag tihiin – tusaale ahaan, carruurtaada, waalidiintaada ama walaalahaaga. Si aad u dalbato qeyb ka mid ah hantidaada, qofka aad xiriirka caadi ah aad isku qabtaan waa in uu maxkamadda aaddaa oo uu ka caddeeyaaa in uu iyadu ama isagu uu kaa caawiyay in uu qayb ka bixiyo. Tani waqti ayey qaadataa waana qaali. Sababahan awgood, dadka iskula nool ee isku qaba xiriirka xeerka caadiga midkoodaba waa in uu haystaa dardaaran qoran oo oranaysa qofka ay doonayaan in hantidooda la siiyo haddii midkooda uu geeriyoodo.

S ***Markaan isla degney, qareenno ayaan u tagney oo waxaan saxiixney heshiiska wada-noolaanshaha. Waxaan go'aansanney in aan is guursano. Maxaa ku dhici doona heshiiskeena wada-noolaanshaha?***

J Goorta aad is guursataan, heshiiskiina wada-noolaanshaha wuxuu noqonayaa heshiiskiina guurka. Labadiinaba haddaad dooneysaan in aad wax ka beddeshaan, waxaad saxiixi kartaan heshiis cusub.

Kala saaridda iyo xallinta arrimaha idinka dhaxeeeya

Waad kala go'deen haddii aadan is la nooleyn oo ayna jirin fursad oo aad dib ugu wada noolaataan. Goorta aad kala go'daan, waxaa jira go'aanno badan oo u baahan in la gaaro.

Waxaad u baahaneysaan in aad qorsheysaan kiina ku hari doona gurigiinna, ayaa bixin doona deymaha lagu leeyahay qoyska, inta taageero dhaqaale ee la bixin doono, sida aad u qeybin doonto hantidaada, iyo ayaa daryeeli doona ubadkaaga.

Siyaabo kala duwan ayaa arrimaha loo xallin karaa.

1. Waxaad lahaan kartaa heshiis aan rasmi ahayn, kasoo noqon kara hadal ah ama qoraal ah.

2. Waxyaabo ayaad isku raaci kartaan go'aanka ka soo baxana ku qori kartaa **Heshiis kala go'idda.** Heshiiska kala go'idda si uu u sharciyeysmo waa in aad markhaati hortiisa ku saxiixdaan. Markhaatiga xitaa waa in uu saxiixaa heshiiska.

3. Waxaad isticmaali kartaa heshiisiye ama dhexdhexaadiye.

4. Waxaad isticmaali kartaa la shaqeeyaha xeerka qoyska. (Haddii aad xiiseyneyso in aad qaaddo tallaabadan, waa in aad qareen la xiriirtaa.)

5. Maxkamadda ayaad aadi kartaa oo aad weydiisan kartaa in maxkamadda go'aamiso.

Waxaa markastaba fiican haddii labadiinnaba aad isku raacdaan si aad arrimihiina idinku u wada xallin lahaydeen. Hannaanka maxkamadda waxay noqon kartaa mid qaali ah oo waqti dheerna qaadata. Haddii adiga ama saygaaga/xaaskaaga aad heshiisku isku waafiqi weydaan, dhexdhexaadiye ayaa laga yaabaa in uu idin caawiyo in aad wada hadashaan oo aad heshiis wada gaartaan. Sidoo kale qareen ayaa idin caawin karaa in aad xal wada gaartaan, balse xusuusnow in isla qareenkii labadiinnaba idin wada caawin karin.

Saxiixista heshiiska kala go'a waa talaabo aad muhiim u ah. Go’aannada aad hadda gaarto waxay saameyn doonaan adiga iyo caruurtaadaba inta noloshiinna ka hartay. Haddii midkiina uu go’aansado inuusan jecleyn heshiiska, waxaad isku dayi kartaa in aad ku gor-gortam heshiis cusub. Haddii aad ku heshiin weydaan waa in aad maxkamadda aad tagtaan oo garsooraha weydiisataan in la beddelo. Heshiiska kala go'ida waa heshiis loo baahan in la dhowro. Qareen waa in aad la hadashaa si aad u hubiso in aad ogtahay dhamaan sharciyada ama natiijooyinka ka dhalan karaan go'aannadaada.

Waxaad xaq u leedahay in aad dhameystirto macluumaad daacad ah ee ku saabsan saygaaga/xaaskaaga xaaladahiisa/heeda dhaqaale ka hor inta aadan go’aan gaarin. Waxba ha saxiixin ilaa aad ka hubiso in aad haysato macluumaadka aad u baahan tahay oo dhan. Hubi in aad fahamsan tahay waxa ku qoran oo aadna ku raacsan tahay.

Go'aannda ku saabsan heshiiska kala go'ida adiga ayuu kuu daayey sharciga. Waxaa laga yaabaa in ay kugu adkaato in aad caddeyso in adiga ama saygaaga/xaaskaaga aad ku ballanteen in aad idinku arrimihiinna aad xallin doontaan haddii aadan haysan heshiiska kala go'idda oo qoraal ah oona saxiixan. Tani dhibaato ayay keeni kartaa haddii saygaaga/xaaskaaga ay joojiso/uu joojiyo in uu dhowro/to dhowrto heeshiiskagii aan rasmiga ahayn.

Waa go'aan adiga iyo saygaaga/xaaskaaga u yaala sida ugu wanaagsan ee aad arrimihiinna idiin dhexeeya aad u meel dhigi lahaydeen. Qareen, heshiisiye ama dhexdhexaadiye ayaa laga yaabaa in uu kaa caawiyo in aad go’aan ka gaarto waxa adiga kuu wanaagsan.

S ***Hadda ayaa waxaan ogaadey in xaaskeyga runta aysan ka sheegin dakhliga soo gala goorta aan ku wada qoreyney heshiiskeena kala go'ida. Waxaaba cadaatay in lacagta ay sameyso ay tahay mid laba laab ah oo ka badan inta ay tiri. Maadaama aan hadda taa ogahay, waxaan u maleyneyaa in aan bixiyo taageero dhaqaale oo aad ubadan. Maxaan sameyn karaa?***

J Tani waa mid ka mid ah xaaladaha aad maxkamadda u aadi karto si aad garsoore ku weydiisato in wax laga bedelo heshiiskaaga kala go'ida. Caadiyan garsoore wax kama beddelo waxa ay lammaneyaasha qof ku heshiiyeen heshiiska kala go'idda. Hase yeeshee, garsooraha heshiiska wuxuu bedeli karaa haddii isaga ama ayada ay ogaato/uu ogaado in shaqsiga uusan soo ahayn daacad runtana ka sheegin macluumaadka dakhliga/dakhligeeda, hantida ama deymaha lagu leeyahay goorta heshiiska la samaynayay.

Xeerka Caadiga ee lammaaneyaal

S ***11 sanadood ayaan wada nooleyn anaga oo aanan is qabin oo hal cunugna waan leenahay. Waxaan leenahay guri iyo gaari oo aan soo wada iibsaney iyo saanadooyin badan. Iskuma fiicnin waxaann ka wada hadleynaa in aan kala go,no. Ma qori karnaa heshiiska kala go'ida?***

J Haa. Labada qof ee isku qaba xeerka caadiga way qori karaan wayna saxiixi karaan heshiisyada kala go'ida isla sida labada qof ee sharci ahaan isku qaba. Waxaad ku dari kartaan wax alla waxa aad labadiinnaba rabtaan in heshiiska lagu qoro. Waxaa muhiim ah in aad midkiinaba u kala tagtaan qareenno kala duwan ka hor inta uusan saxiixin heshiiska.

Utagida Dhexdhexaadiye

Kuwa wax dhexdhixaadiya caadiyan waa shaqaale bulsho, qareeno, dhakhaatiir cilmi-nafsi, ama xirfadleyaal kale. Goorta shaqaalaha xirfadlayaashan ay u shaqeynayaan sida heshiisiyeyaal qoys, howshoodu waa in ay dhegeystaan waxa aad dooneysid iyo ay kaa caawiyaan in aad heshiis ka gaartaan bixinta tageeridda dhaqaale, hanti kala qeybinta, xannaaneynta iyo sida lagu heli lahaa caruurta, ama xaalado kasta.

Heshiisiiyayaasha qofba uma eexdaan ama go'aanno kuuma gaarayaan Talo sharciyeedna kuma siin karaan.

Midkiinnaba waa in uu la hadlaa qareenkiisa ka hor inta aadan is arkin heshiisiye. Marka koowaad waxaad u baahan tahay in aad ogaato sharciga, xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga, ka hor inta aysan billaabin dhexdhexaadinta Caadiyan qareenkaaga kulama aadi doono dhexdhexaadinta

Dhexdhexaadinta qof kastaaba kuma habboona, gaar ahaan marxaladaha ay soo jireen gacan ka hadal ama xadgudub. Haddii aad ka baqeysid, ama uu ku handadayo saygaaga/xaaskaaga, dhexdhexaadinta laga ma yaabo in ay tahay fikrad habboon.

Haddii aad isku kalsoon tahay in aad dhihi karto waxa aad u dooneysid naftaada iyo tan caruurtaadaba fikradahaagana aad difaaci karto, markaa waxaa laga yaabaa in ay fiican tahay in aad isku daydo dhexdhexaadin Waxay fursad kuu siineysaa in aad arrinta xalliso ayadoo kaalmo aad ka heleyso shaqsi saddexaad.

Haddii aadan ku faraxsaneyn sida dhexdhexaadinta ay u socoto, wakhti kasta ayaad ka bixi kartaa. Qareen ayaa beddelkaaga kuu gorgortami kara. Haddii heshiis la gaari kari waayo, maxkamadda ayaad aadi kartaa waxaadna yeelan kartaa in garsoore uu go'aammiyo.

Waa in aad qareen tusta heshiis kasta ee aad gaartaan inta ay dhexdhexaadinta socoto inta aadan saxiixin.

S ***Haddii dhexdhexaadinta aysan shaqeyn, dhexdhexaadiyaha ma usheegi karaa maxkamadda waxa laga yiri inta dhexdhexaadinta ay socotey?***

J Waxay ku xiran tahay haddii aad doorateen dhexdhexaadin "furan" ama mid "xiran". Ka hor inta dhexdhexaadinta aysan bilaaban adiga iyo saygaaga/xaaskaaga ayaa arrintan ka go'aansanaaya. **dhexdhexaadinta furan**, dhexdhexaadiyaha wuxuu qorayaa warbixin buuxda ee ku saabsan waxa dhacey inta ay socotey dhexdhexaadinta wuxuuna ka koobnaan karaa wax kasta oo isaga ama ayada ku fekereyso/fekiraayo in ay muhiim yihiin, macluumadkaasna wuxuu diyaar u noqonayaa maxkamadda. **dhexdhexaadinta xiran,** dhexdhexaadiyaha warbixintiisa waxa kaliya ay oraneysaa heshiiska aad wada gaarteen, ama in aadan heshiis wada gaarin.

S ***Sideen ku heli karaa dhexdhexaadiye? Sideen ku ogaan karaa haddii dhexdhexaadiyaha uu wanaagsan yahay?***

J Waxaad magacyada dhexdhexadiyayaasha ka heli kartaa (Ontario Association for Family Mediation). Sidoo kale qareennada ayaa badanaaba og magacyada dhexdhexaadiyayaasha xaafadda. Jaaliyaddaha qaarkood, waxaa jira adeegyo dhexdhexaadin oo ku xiran Maxkamadda Qoyska ee Maxkamadda Sare ee Cadaaladda. Goobahaas, waxaa laga bixiyaa adeegyo xallinta qilaafaadka yar yar waana bilaash. Adeegyada dhexdhexaadinta ee ka baxsan goobtaas waxay diyaar u yihiin xallinta arrimaha adag. Adeegahaas ka baxsan goobta waxaa laguugu soo dallacayaa lagu saleeyay dakhliga ku soo gala.

Wakhtiga haatan la joogo ma jiraan xirfadleyaal dhedhexaadiyeyaal shatiyaysan. Adiga ayay ku jirtaa in aad weydiiso dhexdhexaadiyaha qibradiisa/deeda ama tababarkiisa/keeda. Haddii aadan ku qanacsaneyn, ama ku faraxsanayn,d hexdhexaadiye kale raadi.

S ***Dhexdhexaadinta ma qaali baa?***

J Qiimaha dhexdhexaadinta waa kala duwan yahay. Kooxo jaaliyadeed qaar waxay bixiyaan adeegyo dhexdhexaadin oo daqliga ku soo gala ku salaysan. Dhexdhexaadiyeyaasha gaarka loo leeyahayna waa kuwo nafsi ahaantood ganacsi ugu jira kharashkoodana aad ayuu u kala duwanaan karaa ujridoodana kala duwan tahay.

Utagida garqaade

Garqaadeyaasha caadiyan waa qareenno, takhtarrada cilmi nafsiga carruurta ama garsooreyaal hore oo go'aan dhexdhexaad ah u gaara dadka ku heshiin waaya in ay go'aan haboon ka gaaraan arrimahooda. Dhexdhexaadiyeyaasha waxay uga duwan yihiin, garqaadeyaasha waxay awood u leeyihiin in ay sameeyaan go'aan in la adeeco ay khasab ku tahay laba qof ee isqaba haddii ay isku raacaan habka heshiisiinta. Aanan ka ahayn marxaladaha qaar, go'aanka garqaadeyaasha waa kama dambeyn oo labada qoloba waa in ay qaataan.

Qareennada ayaa laga yaabaa in ay dadka u diraan garqaade maxaa yeeley way awoodi waayen in ay ku heshiyaan in ay xaliyaan dhib ama dhibaatooyin dhex yaalla. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in aad ku raacdey in aad saygaaga/xaaskaaga siiso taageero dhaqaale, balse waxaad ku heshiin weydeen inta aad bixineyso ama muddada. Haddii adiga iyo saygaaga/xaaskaaga aad ku heshiisaan, garqaade ayaad weydiin kartaa in go'aan idiin sameeyo.

Qarashka garqaadaha caadiyan waxaa qeybsanaaya adiga iyo qofka kale. Midkiinnaba waa in uu qareenkiisa la hadlaa ka hor inta aadan dhexdhexaadiye u tagin.

Garqaadidda waa wax ku soo badanaya dacwadaha xeerka qoyska sidaa daraadeed waxaa jira xeerar cussub loo soo jeediyey garqaadeyaasha ka howl gala dacwadahan, iyo hanaan cusub oo lagu hubinaayo in garqaadidda ay tahay mid xaq ah. Waa in aad hubisaa haddii shuruudahan cusub la howl geliyey, madaama ay goorta buug yarahan la daawacey aysan weli sharci noqon.

Goorta isbeddelka la howl geliyo, garqaadeyaasha waa in go;aankooda ku saleeyaan sharciga Canada si go'aanadooda ay u noqdaan kuwo taaba-galaya Adiga iyo saygaaga/xaaskaaga waa in aad ku heshiisaan in aad isu gar naqdaan ka dib marka ay arrimo idin dhex marto, ma ahan in ay noqoto sanado ka hor ee heshiiska guurka ama heshiiska wada-noolaanshaha. Sidoo kale, adiga iyo

saygaaga/xaaskaaga midkiinaba waa in uu talo ka helaa qareenkiina ka hor inta aadan bilaabin hanaanka garqaadista Sharciyada cusub ee garqaadeyaasha waxay hubin doonaan in ay leeyihiin tababar, oo ay fahmayaan xadgudubyada ka dhex dhaca qoyska, iyo in ay diiwaan geliyaan garqaadistooda.

Xulashada qareen

Bogga 58

Bogga 58

Haddii aad raadineyso qareen kaa caawiya xallinta arrimaha xeerka qoyska**,** raadso mid qibrad u leh howlaha xeerka qoyska. Waxaa laga yaabaa in ay saaxiib ama ehel aad ka hesho mahac qareen. Waxaad wici kartaa Adeega Udiridda Qareen (Lawyer Referral Service) si aad u hesho magac qareen oo ku siin kara talo soconeysa nus saac oo bilaash ah. Haddii dakhligaaga uu yar yahay, ama haddii aad qaadato cayr, waxaa laga yabaa in aad u qalanto oo aad hesho caawimaad sharciyeed. Caawimaad sharciyeed waxaa ay kaa gargaari kartaa in aykaa bixiso qaar ama dhammaan qarashka qareenkaaga. Legal Aid Ontario inta xafiisyo ee ay ku leedahay xaafaddaada waxay ku qoran yihiin buugga talefoonka. Haddii aad dalbato caawimaad xaga kharashka qareenka, waa in aad tustaa cadeyn ah dakhligaaga, daymaha iyo hantida aad leedahay. Haddii aad shaqeyso, waxaa laga yaabaa in aad kula heshiiso in qeyb ka mid ah ama dhammaan lacagta qarashka qareenka dib u bixiso.

Qareenkaaga wuxuu wax kaaga sheegi karaa sharciga oo wuxuu kaala hadli karaa adeegyada laga helo xaafadda oo ku caawin kara.

Wada hadallada aad la yeelato qareenkaaga waa mid qarsoodi ah. Qareenkaaga dadka kale kalama hadli karo waxyaabaha aad adiga u sheegtey adiga oon u fasaxin.

Haddii aadan ku farxsaneyn qareenka habka dacwadaada uu u wado, waxaad xaq u leedahay in aad sheegto. Qareenkaaga kala hadal arrintaa. Qareenkaaga adiga ayuu kula shaqeyneyaa.

S ***Ka dib marka aan todoba sano is wada qabney, waxaan go'aansaney in aan kala tagno. Waan ka wada hadalney sida aan u qeybsan l hayn saabaankeenna iyo alaabta gurigeenna. Wax caruur ah ma qabno. Ma waxaan ubaahan nahay qareen aan wada aragno?***

J Haa. Midkiinnaba waa in qareenno kala duwan aragtaan. Hadda waxaa laga yaabaa in aysan sidaa muhiim u ahayn, balse waqti dambe ayay dhibaato idinka badbaadineysaa.

Qareenka kaaga ayaa kuu ilaalin kara danahaaga, kuu sheegi kara waxyaabaha aadan weli ku fekirsaneyn (sida xuquuqaha lacagta dadka howl-gabka qaata ama canshuuraha) oo iska hubi in aad fahamto waxyaabaha aad ku raaceyso heshiiska.

S ***Seygeyga wuxuu haystaa shaqo fiican oo wuxuu sameyaa mushahar fiican. 10ka sanadood ee la soo dhaafey waxaa ahaa guri joogto caruurta ayaan daryeelayey. Qareen wax lacag ah uma haayo. Maxaan sameyn karaa?***

J Waa in aad wacdaa xafiiska caawimaadda xaga kharashka qareenka ee xaafaddaada. Waxaa laga yabaa in aad u qalanto in lagaa caawimo kharashka qareenka maxaa yeeley ma awoodid in aad iska bixiso qarashka qareenka. Haddii saygaaga/xaaskaaga aad mustaqbalka dambe ka hesho lacag ama hanti, weli waxaa hadda laga yabaa in aad hesho caawimaad xaga kharashka qareenka ayadoo laguugu xirayo in lacagta dib u bixiso goorta aad hesho lacagta aad ka sugeyso saygaaga/xaaskaaga.

S ***Saygeyga/xaaskeyga wuu igu xadgudbay. Waan ogahay waa in aan tagaa, balse ma haysto meel aan aado oo qareenna ma awoodo in aan iska bixiyo. Sidee baan ku heli karaa talo sharci?***

J Haddii xadgudub laguugu sameeyey, waxaad xaq u leedahay adeegyada sharciga deg degga ayadoo loo maraayo Legal Aid Ontario. Qareen ayaad laba saacadood oo bilaash ah ula hadli kartaa. Hooyga dumarka, xafiiska caawimaad xaga kharashka qareenka ama rugta sharciga ee jaaliyadda ayaa kuu sheegi kara sida aad u heli karto adeegyada sharciga oo bilaash ah.

Bogga 58 iyo 59

Markaad maxkamad aadeysid

Haddii adiga iyo saygaaga/xaaskaaga aad isku af garan weydaan sida loo xallin lahaa arrimaha idin dhexyaalla, waxaad aadi kartaa maxkamad weydiina kartaa garsoore in uu kuu go'aammiyo.

Mararka qaar wax kasta waad isku af garan kartaan aanan ka ahayn hal shay, xannaaneynta caruurta ama waxa laga sameyn lahaa hoyga qoyska. Maxkamadda ayaad aadi kartaa oo aad weydiisan kartaa in maxkamadda go'aammiso halkaas shay.

Go'aamo badan oo ku saabsan carruurta iyo taageridda dhaqaale waxaa laga yaabaa in si dhaqso ah loo sameeyo. Haddii aadan isla markiiba isku af garan waxa la sameynaayo, maxkamadda ayaad aadi kartaa oo aad weydiisan kartaa in uu bixiyo **amar ku meel gaar ah.** Amarkan wuxuu daboolayaa waxyaabo sida xannaaneynta, iyo helitaanka caruurta, ayaa joogi kara hoyga qoyska, iyo inta taageero dhaqaale ee la bixinaayo.

Aysan ka ahayn in ay maxkamadda si kale amarto, amarkan ku meel gaarka ah wuxuu sii jiraaya ilaa ay maxkamadda ay waqti uga hesho in ay dacwaddaada si buuxda u dhegeysato. Markaas ka dib ayaa maxkamaddu go'aan kama dambeys ka gaari doontaa.

Badanaaba, maxkamaddu waxay qaban doontaa **kulan dacwad** ama **kulan maslaxad** Kulammadan waxay adiga iyo saygaaga/xaaskaaga iyo/ama qareennadaada siinayaan fursad, haddii lagu matalayo, in aad ula kulantaan garsoore si arrimaha dacwaddaada looga hadlo. Garsooraha waxaa laga yaabaa in uu kugula taliyo in aad aragto dhexdhexaadiye, haddii aadan hore taa sameyn. Mararka qaarkood, garsooraha wuxuu kuu sheegayaa waxay fikradiisa/deeda tahay siduu garsooraha dhegeysan doona dacwada go'aankiisa noqon karo. Fikradda garsooraha ma go'aammin doonto qodobbada arrintaada. Hase-yeeshee, waxaa laga yaabaa in ay kaa caawiso in aad adiga iyo saygaaga/xaaskaaga heshiis ka wada gaartaan. Xataa haddii aad wax walba ku heshiin , waxaa laga yaabaa in aad ku heshiidaan qodobbada gaar axaa ay kaa caawin karaysaa in aad heshiis la gaarto saygaaga~xaaskaagahaddii aad wax kasta aad isku af garan weydaan, waxaa laga yabaa in aad arrimo qaar ah isku af garataan.

S ***Waan ku heshiin la'nahay qofka la siin doono carruurteena. Goorta aan maxkamadda aan aadayno, carruurta ayaguna ma in ay aadaan baa?***

J Garsoorka wuxuu u baahnaan doonaa macluumaad ku saabsan baahida carruurta iyo xiriirka ay midkiinnaba la leeyihiin. Garsoorayaasha guud ahaan waa ka leexdaan in caruurta ay markhaatifur ka bixiyaan dacwadaha noocaan ah. Sida ay ubadan tahay, garsoorka wuxuu weydiisan doonaa **qiimeyn.** Qiimeyntu waa dib-u-eegid sharaxan oo ku saabsan xaaladda qoyskaaga uu ka warbixinaayo qof sida shaqaale bulsho, dhakhtar cilmi nafsi. Qofka qiimeynta sameynaayo badanaaba wuxuu la kulmi doonaa qof kasta oo ka mid qoyska iyo mararka qaarkoodna dad kale. Asaga ama ayada warbixin ayey maxkamadda u qori doontaa kaddib, waxyaabaha warbixinta ku qoran waxay noqon doontaa talooyin la xiriira arrimaha heysashada iyo/ama booqashada carruurta. Badanaaba waxaa dhacda, adiga iyo saygaaga/xaaskaaga ayaa mas'uul ka ah qarashka qiimeynta.

Marar qaarkood garsooraha ayaa laga yaabaa inuu **Caruurta Qareenkooda** weydiiyo in uu howl galiyo baaritaan warbixinna dardaaran la socdana uu maxkamadda u soo gudbiyo . Caruurta Qareenkooda waxaa laga yaabaa in uu baare ka howl gala in arrinta uu soo baaro uu diro. Baarahaa wuxuu la kulmi doonaa carruurta, waalidiinta iyo dadka kale.

Haddii maxkamaddu u dareento in caruurta faa'ido ugu jirto in ay qareen ayagu u goonni ah yeeshaan inta ay dacwadu socoto, maxkamaddu waxay Qareenka Caruurta weydiisan kartaa in ay siiso qareen maxkamadda ku matala danaha carruurta.

S ***Qareen miyaan u baahan nahay si aan maxkamad u aado?***

J Maya Qareen la'aan ayaad maxkamadda aadi kartaa. Ka dib adiga yaa mas'uul ka ah dhameystirka iyo buuxinta dokumentiyada muhiimka ah ee maxkmadda oo dhan. Macluumaad ku saabsan dhameystiridda foomamkan waxaad ka heli kartaa maxkamadda Xarunteeda Macluumaadka Xeerka Qoyska. Sidoo kale waxaad weydiin kartaa shaqaalaha maxkamadda haddii uy jiraan hageyaal ku caawini kara hannaanka. Sidoo kale adiga ayaa nafsi ahaantaada uga hor hadli doontaa garsooraha hortiisa.

Bogga 53

Maxkamaddo qaar waxay leeyihiin qareeno loogu magacaabo la taliye shaqada ku jira. Caawimaadda Sharciga waxay dadka ugu deeqaan qareenno aan dadka dakhligoodu yar yahay kharash ugu baxeyn. Howshoodu waxay tahay in ay dadka uga jawaabaan su'aalaha ay qabaan iyo in ay caawiyaan maxkamadda. Waxaa laga yabaa in ay ku siyaan maclumaad ku saabsan sharciga. Mararka qaarkood, sidoo kale la taliyaha howsha ku jira ayaa maxkamadda ka hadli kara asiga/ayada oo magacaaga matalaya oo kaa caawin kara gorgortanka maslaxadda.

Sidii aad u heli la'hayd furitaan

Heshiisyada kala go'ida iyo amarrada maxkamadda waxay xaliyaan marxaladaha qoyska goorta aad kala go'aysaan balse sharci ahaan guurkiina halkaasi kuma ekeeyaan. Sida kaliya ee tan lagu sameyn karo waa furriin. Maxamadda kaliya ayaa furriin ku siin karta

Furiin waxaad heli kartaa adiga oo soo bandhiga in guurkaaga uu dhamaadey. Tani waxaad ku cadeyn kartaa adiga oo tusa in aad hal sano aad kala noolaydeen, ama in seygaaga ama xaaskaaga uu qof kale lahaa xiriir galmo, ama in seygaaga ama xaaskaaga uu maskax ama jir ahaanba kugu xag gudbey.

Haddii aad isku af garan weydaan shuruudaha furriinkiinna, maxkamadda ayaad aadi kartaa maxkamadda ayaad dayn kartaa in ay go'aammiso. Haddii aad isku af garataan, maxkamadda ayaad ka diiwan gareyn kartaa go'aankaaga. Xaaladu markay sidaa tahay, waxaa laga yaabaa in aadan u baahan inaad garsoore aragto. Goorta ay furiinka uu gabogabo gaaro, markaas ayaad mar kale guursan kartaa.

S ***Waxaan kala nooleyn muddo shan sanadood oo waan ku faraxsan nahay sida heshiiska kala taggeenna uu usocdo. Hadda waxaan jeclahay in aan furriin helo hadda. Waraaqaha howlahooda aniga nafsi ahaanteyda ma samayn karaa?***

J Haa. Hase-yeeshee, waxaa fikrad wanaagsan ah in marka hore aad qareen la hadasho si aad u hubiso in aad garatey dhammaan waxyaabaha ka dhalan kara markaad wax fureyso. Qareenkaaga ayaa kaala talin kara taageerada dhaqaale, canshuurta, lacagta howl-gabka qaato iyo arrimo kaleba.

II. XUQUUQAHAAGA SHARCIGA IYO WAAJIBAADYADAADA

Joogista hoyga qoyska

Hoyga qoyska waa meel khaas ah. Waa halka aad ku nooshahay iyo halka caruurtaada ay ku amaan heleyso. Haddii guriga adiga aad leedahay, waxaa laga yaabaa in uu yahay waxa ugu qaalisan ee aadigu leedahay.

Haddii aad guursatey, labadiinnaba waxaa xaq siman u leedihiin in aad guriga wada joogtaan aanan ka ahayn haddii garsoore uu go'aammiyo in midkiina uu ka guuro mooyee.

Madaama aad labadiinaba aad xaq u wada leedihiin in aad guryihiina wada joogtaan, qofkiin ma sii kireyn karo, ma iibin karo ama dayn kuma qaadi karo iyada oo uu qof kale u fasixin. Tani waa run xitaa haddii heshiiska guriga uu midkiin kaliya ku qoran yahay ama haddii midkiin kaliya uu leeyahay guriga.

Goorta aad kala tagtaan, labadiinaba waxaa laga yabaa in aad dooneysaan in hoyga qoyska aad wada joogtaan. Haddii aad ku heshiin weydaan qofka joogi doona hoyga qoyska, waxaad isticmaali kartaan qareeno, heshiisiye, ama dhexdhexaadiye oo kaa caawiya in aad go'aansato, ama waxaa laga yabaa inaad u baahan tahay in aad maxkamadda aaddo si maxkamadda u go'aammiso kiinna sii joogi doona

Waxaa laga yabaa in, kala go'a ka dib, ay ahaato in midkiinnaba uusan awoodin in uu gurigiinna joogtaan.

Haddii aad carruur leedihiin, shaqsiga caruurta haysta ayaa waxay u badan tahay in uu hoyga qoyska uu carruurta la joogo. Tani waxay caruurta ka caawineysaa in ay ku bartaan marxaladda cusub ee reerkooda ku sugan yahay xaafad iyo deris ay horeyba u garanaayeen.

Xeerka Caadiga ee lammaaneyaal

S ***Ka hor inta aanan isla soo degin, guri baan lahaa. Guriga weli magaceyga ayaa ku qoran oo lacagtii daynta weli waan bixiyaa. Marie-na waxay bixisaa dayactirka iyo qarashka xannaaneynta. Haddii aan kala tagno, ma xaq bay u leedahay in ay guriga joogto?***

J Waa laga yaabaa. Haddii garsoore uu kugu amro in aad tageero dhaqaale aad siiso Marie ama carruurtiinna, sidoo kale garsooraha wuxuu kaloo ku amri karaa in Marie ay guriga joogto. Muhim ma aha qofka guriga iska leh. Sidoo kale Marie waxaa kaloo ay ku weydiin kartaa in aad dib u siiso lacagtii ay ku bixisey dayactirka ama qarashka xannaaneynta guriga. Xusuusnow, haddii adiga ama Marie aad is guursataan, xuquuqdaada way isbeddelaysaa.

Daryeelista caruurtaada

Waalidiinta ayaga ayaa ka mas'uul ah ubadkooda. Goorta qoysku uu wada deggan yahay, labada waalidba waxaa mas'uul ka saaran barbaarinta ubadkooda, waxbarashadooda iyo nolol maalmeedkooda. Tani waxay quseysaa haddii ay waalidiinta is qabaan iyo haddii kaleba.

Goorta aad kala go'daan, waa in aad qorsheysaa daryeelista caruurtiinna. Waxay u baahan yihiin meel ay ku noolaadaan, cunto iyo dhar. Tan ugu muhiimsan waxay tahay, waxay u baahan yihiin in la muujiyo in la jecel yahay iyo in la taageero xittaa haddii waalidiintooda aysan isla wada degganeyn.

Tan ugu wanaagsan ee aad sameyn karto waa in aad ka wada shaqeysaan sida aad u daryeeli lahaydeen carruurta markaad kala tagtaan ka dib.

Haddii aad wax isku af garataan, waxyaabaha aad ku heshiisaan waxaad ku qori kartaan **qorshaha barbaarinta.** Qorshaha barbaarinta waxay ka koobnaan kartaa marka waalid kasta caruurta uu la joogaayo iyo qofka caruurta u sameynaayo go'aamada muhiimka u ah. Qorshaha barbaarinta wuxuu noqan karaa heshiis aan rasmi ahayn oo labaddiina idin dhex mara, ama wuxuu qeyb ka noqon karaa heshiiskiinna kala go'idda ama amar maxkamad. Haddii qorshahan yihiin kuwa aan rasmi ahayn, waxay noqon karaan kuwa ay adag tahay in la hirgeliyo.

Haddii aad ku heshiin weydaan qofka xannaaneyn lahaa caruurta, maxkamadda ayaad aadi kartaan oo garsoore ayaad weydiisan kartaan in uu go'aammiyo. Garsooraha waxaa laga yaabaa in uu weydiiyo in **qiimeyn** uu sameeyo takhtar baara, shaqaale bulsho, dhakhtarka cilmi-nafsiga. Shaqsiga wuxuu la hadli doonaa labadiinna, caruurta iyo mararka qaarkood dad kale. Asiga ama ayada warbixin bay maxkamadda u soo qori doonaan, ku talinaaya halka ay tahay in caruurta

ku noolaadaan iyo goorta ay tahay in ay arkaan waalidka aan markaas gacanta ku hayn.

Garsooraha waa in uu kaliya ku fekiraa danaha ugu wanaagsan ee carruurta goorta uu go'aaminaayo haysashada caruurta. Garsooraha la socodsii haddii saygaaga/xaaskaaga weligiisa/geeda uu gacan ka hadal ama xadgudub uu adiga ama caruurta sameeyay, maxaa yeeley sharciga wuxuu garsoorka ka dooneyaa in arrintaa xisaabta ku daro. Garsooraha wuxuu eegi doonaa dhammaan macluumaadka uu maxkamadda dhexdeeda ku maqlay oo xisaabta uu ku daran doonaa halka ay caruurta ay hadda ku nool yihiin. Haddii hal waalid ay xoogaa la noolaayeen oo waxkastana ay hagaagsan yihiin, garsooraha waxaa laga yabaa in uu dooneyn in uu taa wax ka bedelo.

Haysashada: Haddii heshiiskaaga kala go'idda ama amarka maxkamad kuu ogolaado in aad caruurtaada adiga haysato, caruurta adiga ayay kula noolaan doonaan. Waxaad xaq u leedahay in aad daryeelkooda, waxbarashadooda, diinta lagu tababari lahaa iyo caafimaadkoodaba go'aanno ka gaarto - aanan ka ahayn haddii heshiiska ama amarka maxkamadda si ka duwan uu leeyahay.

Haysasho Wadajir ah: Waalidiinta haysata xannaanenyta wadajirka ah waxay wadaagaan xuquuqda go'aammada daryeelka ubadkooda ay ku gaaraan. Caruurta waxaa laga yaabaa in ay wakhtiga nuskiisa ku qarash gareeyaan hal waalid nuska kalena waalidka kale ama waxaa laga yaabaa in waqti badan ay hal waalid la joogaan. Labada waalidiinba lug ayey ku leeyihiin in go'aammada carruurtooda wadajir u gaaraan. Si ay haysasho wadajir ah ay u shaqeyso, waalidiinta waa in ay awoodaan in midkiiba midka kale la hadlaa oo ay wada shaqeeyaan xittaa haddii aysan wada degganeyn.

Booqashada: Haddii aadan haysan amarka haysashada carruurtaada, waxaad xaq u leedahay in aad wakhti wada joogtaan aaysan ka ahayn haddii maxkamadda go'aammiso in tani aysan ahayn danaha ugu wanaagsan ee caruurta. Qorshaha booqashada carruurta waxay noqon kartaa mid si faahfaahsan loogu qoro qorshaha barbaarinta, heshiiska kala go'idda ama amarka maxkamad. Qorshaha, heshiiska ama amarka wuxuu oran karaa, tusaale ahaan, in carruurta ay adiga kula joogi doonaan maalmaha nasashada ee toddobaad dhaaf.

Ama, qorshaha helista caruurta waxay noqon kartaa mid furan, oo idinka la idin dhaafayo in aad heshiis la gaarto waalidka kale sida idinka idinla habboon. Way adag tahay in la dardar geliyo qorshaha booqashada noocan ah.

Sidoo kale waxaad xaq u leedahay in aad hesho macluumaad ku saabsan caruurtaada caafimaadkooda, waxbarashadooda iyo xaaladaddooda guud ahaaneed. Xaq uma lihid in qeyb ka ahaato goorta laga arrinsanaayo waxyaabahan.

Aanan ka ahayn haddii aad wada haysataan carruurtaa ama heshiiska kala go'idda ama amarka maxkamadda uu dhahaayo in aad wadaagtaan go’aan gaaridda.

Maxkamadda waxaa laga yaabaa in ay kuu diiddo in aad caruurtaada aragto haddii cabsi looga qabo in aad waxyeelo aad u geysato waalidka haysta carruurta, ama haddii ay jirto cabsi ah in caruurta aadan u soo celin doonin waalid haysta xanaaneynta.

Ilaalada Kormeerka: Haddii uu jiro wal wal ku saabsan amaanka caruurta, iyo/ama waalid, waalidiinta waxay isku af garan karaan, ama maxkamadda waxay ugu baahnaan kartaa, in goorta waalidka uu caruurtiisa u tagaayo ama ay imanayaan in la komeero. Tani micnaheedu waxay tahay in qof kale in uu goob joog yahay goorta aad carruurtaada arkayso. Mararka qaarkood waalidiinta waxay isku af garan karaan saaxiib ama ehel kormeera goorta ay carruurtooda booqanayaan. Sidoo kale waalidiinta waxay kaloo lacag siin karaan shaqaale, sida shaqaale bulsho goorta ay booqanayaan carruurtooda in ay ku kormeeraan. Jaaliyado badan oo Ontario degan, waxaa jira Xarumo Ialalin Kormeer (Supervised Access Cenrtres) oo ay joogaan shaqaale u tababaran iyo iskaa wax u qabsato. Shaqaalaha Xarumahan Ilaalada kormeerka markaad isla qorsheysaan, qoysaska waxay xarumaha ay soo xaadiri karaan goorta ay carruurtooda ay soo booqdaan ayaga oo lagu kormeerayo ama ku soo dejiyaan xarunta iyo/ama u yimaadaan in caruurtaada ay ka kaxeeyaan booqashada ay waalidkooda ku soo booqdeen.

Bogga 59

Fulinta haynta iyo amarada aragtida

Haddii ay maxkamadda amarto in haynta ama aragtidooda oo aanan la oofin, waxaad maxkmadda aad weydiin kartaa in la fuliyo amarka. Maxkamadda waxay isku dayi kartaa in waalidiinta ay ka hesho in ay dhowraan haysashada iyo qorshaynta aragtida ee carruurtooda. Maxkamadda waxaa laga yabaa in ay labada waalidba weydiiso in ay maxkmadda yimaadaan oo sharraxaan waxa dhacaya. Haddii maxkamadda ku qanacsan tahay in waalidka uusan helayn caruurtiisa/teeda ayadoon sabab fiican jirin, markaa maxkmadda waxay ganaaxi kartaa waalidka haysta carruurta ama xitaa xabsi ayuu u diri karaa. Haddii dhib badan ka jiro haysashada ama qorshaynta booqashada carruurta, maxkamadda qorshaynta beddel bay ku sameyn doontaa.

Sidoo kale waxaad weydiisan kartaa in ay xoog ku fuliso haysashada iyo qorshaha booqashada ee ku qoran heshiiska kala go'idda.

- ***Heshiiskeena kala go'a wuxuu leeyahay in xaaskeyga la siiyey caruurteenna oo aan aniga aan arki karo. Uma maleynaayo in xaaskeyga ay si wanaagsan u daryeesho carruurta. Waxaan u maleynayaa in carruurta ay u wanaagsan tahay in ay aniga ila noolaadaan. Heshiiskeenna kala go’idda mala beddeli karaa?***

J Waa laga yaabaa. Waxaad isku dayi kartaa in heshiis cusub ee haysashada carruurta aad la gasho saygaaga/xaaskaaga. Haddii tani aysan suurto galayn, maxkamadda ayaad aadi kartaa oo aad weydiisan kartaa in maxkamadda ku siiso in aad adiga carruurtaada aad heysato. Maxkamaddu way baddeli kartaa qorshaynta haysashadaa ama argtida carruurta ee ku qoran heshiiska kala go'idda haddii maxkamadda u maleyneyso in isbeddelka la sameyn doono ay tahay danta caruurta.

S ***Sanadka la soo dhaafey markii aniga iyo saygayga/xaaskayga aan kala tagney, aniga ayaa sii joogey guriga. Caruurta aniga ayey ila joogaan oo waalidkooda kale mar mar ayey arkaan. Ma haystaa xanaaneynta sharciga ee caruurteyda?***

J Waqtiga xaadirka ah, **haynta sharci gashan.** Tani micnaheedu waxay tahay, run ahaantii, in adiga aad haysato caruurtaada oo adiga go'aan aad ka gaartid daryeelka carruurtaada iyo barbaarinta sida adigo oo haysta haysashada sharciyaysan. Saygaaga/xaaskaaga way/wuu oggolaatey/dey heshiiskan. Uma eka in maxkamadda ay beddel ku sameyn doonto xaaladdaada.

Hase-yeeshee, aad bay kugu adkaan doontaa in aad dardar geliso xuquuqdaada haysshada haddii aysan si cad ugu qorneyn amarka maxkamadda ama heshiiska, gaar ahaan haddii adiga ama saygaaga/xaaskaaga isku af garan weydaan heshiiska haysashada carruurta waxa ku qornaa.

Adiga ayaa lagu siin doonaa in aad carruurtaada haysato marka adiga iyo saygaaga/xaaskaaga saxiixdaan heshiiska kala go'ida oo oranaya in adiga aad haysaneyso ama goorta ay maxkamadda tiraahdo in adiga aad heysaneyso carruurta.

S ***Dood badan iyo maxkmadda aan waqti badan joogney ka dib, waxaan helay amar maxkamad in caruurta aan aniga haynayo. Aabbahooda fasax uu ku arko wuu haystaa. Qoyskiisa waxay ku nool yihiin meel dibadda ka ah Kanada. Waxaan ka baqayaa in caruurta uu qaato oo uu aado guriga qoyskiisa oo aan dib mar kale u arag. Maxaan sameyn karaa?***

J Haddii saygaaga/xaaskaaga caruurta uu kaa qaato/qaadato, dembi weyn ayuu galabsanayaa. Booliiska wuu qaban karaa oo waxaa lagu oogi karaa dambi ah afduub. Waxaad hadda sameyn kartaa in aad ku adkeyso in caruurta uu kala tago Kanada. Waxaa jira sharciyo caalami ah oo caawiya in carruurta wadammo badan looga soo celiyo. Qareen kala hadal.

Haddii aad aaminsan tahay in la rabo incarruurta wadanka laga bixiyo, isla markiiba boliiska u yeer.

Bogga 54

Caruurtaada taageeristooda dhaqaale

Labada waalid waxaa mas'uuliyad ka saaran tahay in ay dhaqaale ahaan taageeraan carruurtooda. Mas'uuliyadda tan way wadaagaan goorta ay isla degan yihiin wayna wadaagi doonaan marka ay kala tagaan kaddib. Mas'uuliyadda tan waxay quseysaa waalidiinta dhammaan, ayadoon loo eegeyn haddii ay is qabaan, ay wada nool yihiin ama weligood aan isla wada degin.

Waalidiinta haysata xannaanada caruurta waa in ayagu ay daryeelaan, cunto iyo dhar u iibiyaan, ay caruurta ka bixiyaan qarashka fasaxyada iyo ciyaaraha ku baxa, ilaaliyaan baahidooda maalinlaha ah iyo howlaha guriga ay sii socdaan.

Waalidka aanan haysan caruurta badanaaba waa in uu bixiyaa/ay bixisaa oo ay siisaa waalidka xanaaneeya carruurta lacag ka caawisa kharashka ku baxa daryeelka carruurta. Lacag bixintan waxaa loogu yeeraa masruufka ilmaha.

Caddadka masruufka ilmaha la siiyo wuxuu ku hoos qoran yahay *Xeerka Masruufka ilmaha ee Ontario*. *Xeerka waxaa ku qoran,* masruufka ilmaha ee la bixiyo wuxuu ku xiran yahay dakhliga soo gala
qofka aanan haysan xannaanaynta ama shaqsiga
aan caadi ahaan caruurta la deganayn.

Bogga 53

Mararka qaarkood, maxkamadda waxay ku amri kartaa caddad ka badan ama ka yar inta ku qoran xeerka degsan.

- Tusaale ahaaa, maxkamadda waxay abaal-marin kartaa in ka badan inta ku qoran xeerka haddii cunuga laga bixiyo uu leeyahay "kharash gaar ah". Kani wuxuu ka koobnaan karaa, tusaale ahaan, qarashka ku baxa daryeelka caruurta, qarashka iskuulka uu dhigto ee gaarka loo leeyahay, ujrooyinka iyo qalabka ciyaarta xeegada lagu ciyaaro, ama kharashka ku baxa biraha ilkaha lagu xir xiro.

- Mar mar aan sidaa u badnayna, maxkamadda waxay abaal marin kartaa in ka yar caddadka ku qoran xeerka bixinta haddii bixinta kharashkan uu waalidka la doonayo inuu bixiyo ay u keeni karo " darxumo xad-dhaaf ah".

.Si ay maxkamadda xisaabta ay ugu darto in laga yareeyo inta ku qoran xeerka, waalidka weydiisanaayo in kharashka laga dhimo waa in uu caddeeyaa in ay duruuf adag uuna caddeeyaa in heerka noloshauu ka hooseeyo heerka nolosha guriga uu cunugga ku nool yahay.

S ***Sidee baan ku ogaadaa haddii Xeerka Masruufka Ilmaha i quseeyo?***

J *Xeerka* wuxuu quseeyaa dhammaan amarrada masruufka ilmaha ee la sameeyey ama la badeley 1da Dicembar, 1997 wixii ka dambeeyey.

S ***Waxaan u maleyaeyaa in saygaaga/xaaskaaga hadda uu soo galo/ay soo gasho lacag ka badan goorta masruufka ilmaha lagu amrayay. Sidee baan ku ogaan karaa?***

J Sida ku qoran *Xeerka Masruufka Ilmaha*, qofka xaqa uleh in lasiiyo masruufka wuxuu qofka kale ee masruufka bixiya weydiin karaa macluumaad ku saabsan dakhligiisa/geeda sannadkiiba mar. Codsiga waa in uu ahadaa mid qoraal ah. Qofka bixiya masruufka waa in uu bixiyaa macluumaadka dhaqaale oo uu ka mid yahay:

- Sedexda sanadood ee la soo dhaafey nuqdad ka mid ah warqadda canshuur celinta sanadlaha iyo qoraalada qiimeynta iyo dib u qiimeynta ee la socotey canshuur celintan;

- macluumaad ku saabsan sida shaqsigaas hadda uu ku nool yahay. Tusaale ahaan, haddii shaqsigaas shaqeeyo, asagu ama ayadu waa in ay/u bixisaa/bixiyaa jeegyada ugu dambeeyey dabadooda; haddii asagu ama ayadu iskiis/keed ay/ u shaqeeyso/ shaqeeyo, asiga ama ayadu waa in uu/ay bixiyaa/saa qoraalka maaliyadeed ee ganacsiga, iyo qoraallada muujinaya dhammaan lacagaha la siiyey dadka ama shirkadaha la xiriira shaqsiga bixiya masruufka. Waxaa jira waxyaabo kale oo looga baahan yahay qofka leh shirkad ama milki kula jira shirkad.

- Qoraalka maaliyadeed ee dakhli kasta ee qofka soo gasha oo uga timaadda hanti iyo nuqdado qoraalka maaliyaddeed; iyo

- macluumaadka wakhtiga haatan la joogo oo qoraal ah ee ku saabsan "kharash kasta ee gaar ah" ama "darxumo xad-dhaaf ah”

S ***Saygeyga/xaaskeyga dakhligiisa/geeda goorta uu isbedelo masruufka ilmaheyga isla markiiba ma isbedalayaa?***

J Maya Haddii saygaaga/xaaskaaga daqligiisa/geeda is bedelo, labadiina waxaa laga yabaa in aad ku heshiisaan masruuf cusub. Hase-yeeshee, haddii aad isku af garan weydaan, waxaad u baahnaan doontaa in aad maxkamadda ku laabato si masruuf cusub la isla meel dhigo. Cadaddatan waxaa looga qiyaas qaadanayaa sida ku qoran xeerka u degsan saygaaga/xaaskaaga daqligiisa/geeda cusub.

S ***Waxaan haystaa amar ah masruufka ilmaha oo la sameeyye 1993. Mid ka mid ah saaxiibadeyda ayaa wuxuu ii sheegey in sharciyada canshuurtaa ee saameeya masaariifta ilmaha la bedeley. Isbedeladan miyey isaameeyaan?***

J Maya Sharciga cusub wuxuu saameeyaa oo kaliya amarada soo baxay sharciga marka la bedeley ka dib ee 1da Maajo, 1997. Sharciga hadda wuxuu leeyahay in masruufka ilmaha ee bixiya aysan qofka bixiya u noqoneyn canshuurta lacag uu ka jartaa, qofka qaata ama la siiyo masruufka ilmaha ma ahan in lacagtaasi ka bixiyo canshuur.

Haddii adiga iyo waalidka kale jecel yahay in sharciga cusub lagu dabaqo cadadda masruufka ilmaha ee hadda la bixiyo, labadiinaba waxaad foom u diri kartaan Canada Revenue Agency adigoo ku sheegaya in aad dooneysaan in sharciga cusub ee canshuurta lagu dabaqo tiina.

Maxkamadda haddii aad ku laabato oo aad bedeleyso amarkii hore, sharciga cusub ayaa amarka cusub lagu dabaqayaa.

S ***Amarka masruufka ilmahayga marka la amray waxaa loo hoos tagey xeerka waxbnaa kama oran lacagta la bixiyey in lagu aaddiyo qarashka maciishadda. Sicir-bararka wuxuu macnihiisa ahaan karaa in lacagta masruufka aysan wax qiime ah lahaan doonin laba sanado kaddib. Tani wax ma ka beddeli karaa?***

J *Xeerka Masruufka Ilmaha* kuma cabbiro lacagta masruufka marka qarashka maciishadda kor u kacdo. Lacagta waxaa lagu saleeyaa dakhliga soo gala waalidka masruufka bixiya. Haddii dakhliga waalidkaas kor u kaco, waxaad weydiisan kartaa in masruufka ilmaha la kordhiyo.

S ***Mid ka mid ah saaxiibbadeyda wuxuu ii sheegey in sharciyada canshuurta ee saameeyaan Xeerka Masruufka Ilmaha wax laga bedeley. Isbedelladan miyey i saameynayaan?***

J Maya Isbedallada cussub waxa kaliya ee ay saameeyaan amarrada la sameeyey marka sharciga la beddlay May 1, 1997 kaddib. Sharciga hadda wuxuu leeyahay in lacagta masruufka carruurta uusan lahayn canshuur dhaaf, iyo qofka la siiyo masruufkana aysan ahayn in uu canshuur ka bixiyoHaddii adiga iyo waalidka kale aad jeceshihiin in sharciyada cussub ee canshuurta la gu saleeyo caddadka masruufka ee jiray , waxaad labadiinnaba foom u diri kertaan Hay dda anshuurta Canada idinkoo tilmaamaya in aad doonaysaan in la idinku dhaqo sharciyada cussub ee canshuurta.

Haddii aad maxkamad u noqoto si aad u beddesho amarkaagii hore, sharciyada cussub ee canshuuraha durbadiiba way khuseeyn doonaan amarkaaga cusub.

S ***Masruufka ilmaha si daacad oo joogto ah ayaan u bixinaayey oo hadda xaaskeyga waxay bilowdey in ay igu ciyaarto goortaan ciyaalka aan arki lahaa. Maalmaha nasashada ee toddobaadkii hore waxaan u baxey in ciyaalka soo kaxeeyo waxayna igu tiri in maalintaas ay guriga ayeeyadood ay aadeen. Waa maxay sababta aan masruuf u bixinaayo haddii aan ciyaalkeyga aanan arki karin?***

J Sharicgu aad buu u cad yahay. Masruufka ilmaha weli waa lagugu leeyahay ayadoon loo eegeyn waxa ka dhacaya qorshaha booqashada caruurta. Lacagta masruufka ilmaha ee aad bixiso waa mid aad kaga qayb kaga caawineyso wadaagista qarashka daryeelka carruurtaada. Balse waxaad xaq uleedahay in qorshaha booqashada car uurta la dhowro. Kala hadal qareenkaaga, heshiisiiyaha, ama la taliyaha qoyska arrinta ku saabsan dhibaatada kaa heysata aragtida carruurtaada. Qof kasta faa'ido ayay u tahay haddii aad saygaaga/xaaskaaga isku af garataan idinka oo aan maxkamad aadin.

Xeerka Caadiga ee Labada qof

S ***Martine iyo aniga isma qabno. Waxaan wada nool nahay siddeed sanadood oo waxaan leenahay laba mataano oo afar jir ah. Martine way daashey oo khaati-ayey kaa taagan tahay oo waxay dooneysaa in ay iga guurto oo kaligeed meel degto. Waxaan ku heshiiney in aniga aan mataamaha heysan doono. So ma ahan in Martine bixiso masruufka ilmaha?***

J Haa. Caddadka masruuf ee lagu siinaayo waxaa lagu qorey *Xeerka Masruufka ilmaha.* Caddadka wuxuu ku saleysan yahay

dakhliga Martine. Caruurta waxay xaq u leeyihiin la siiyo taageero dhaqaale oo ay labadooda waalidba ka helaan, haddii ay waalidiintooda is qabaan iyo haddii kaleba. Labada qof ee isku qaba Xeerka Caadiga (Common Law) mas'uuliyad siman ayaa ka saaran carruurtooda sida laba qof ee is qaba oo kale.

Waalidiinta weligood aan wada degin

S ***Muddo yar ka hor waxaan xiriir gaaban aan la yeeshay Joan. Marnaba islama degin. Kaliya marar aan sidaa u badneyn ayaan isla-soconney. Waxaan kala harnay markii aan ogaaday in ay qof kale la socotay isla wakhtigii ay aniga ila socotay . Dhowaan ayey dhashey wiil, oo waxay igu tiri cunugga adiga ayaa iska leh oo maxkamadda ayey ii waddaa si ay masruufka ilmaha u hesho. Uma maleynaayo in aan anigu aabaha ahay, oo xittaa haddii aan ahay, uma jeedo sababta la iigaga baahan yahay in aan masaruuf ka bixiyo cunugga.***

J Haddii cunuga aad adigu leedahay, waxaa ku saaran waajibaad sharci ee ah in aad taageerto cunugga, xitaa haddii aad adiga iyo Joan aan marnaba isqabin ama aadan wada degganeyn. Sidoo kale waxaad xaq u leedahay in aad aragto cunuggaaga si aad adiga iyo cunuggaaga aad wakhti isla qaadataan. Hase-yeeshee, haddii aad aaminsan tahay in uusan ahayn cunuggaaga waxaad dalban kartaa in lagaa qaado sugidda aabbanimada. Haddii midkooda aad kula heshiin weydo Joan, maxkamaddu ayaad waxaad weydiin kartaa in laga qaado sugidda aabbanimada.

Waalidka Hooyo/Aabbe ay is qabaan

S ***Goorta aan Jason is guursannay shan sano ka hor, waxaan ahaa hooyo kali ah, oo xannaanaysata wiilkeeda sedex-jirka ah, Aad baan iskugu wanaagsaneyn ilaa bilo ka hor. Hadda waxay igula eg tahay in aan ku sii socono in aan kala go'no. Haddii aan kala tagno, Jason ma inuu bixiyaa wax masaruuf ee cunuggeyga ku leeyahay?***

J Haddii Jason oglaadey mas'uuliyadaha uu waalid ugu noqonaayo cunuggaaga, waxaad xaq u leedahay in aad weydiisato in uu masruuf bixiyo, xitaa haddii uusan ahayn aabbaha dhaley cunuggaaga. Garsoore ayaa go'aammin kara haddii Jason, dhab ahaantii, cunuggaaga ula dhaqmaayey sida qof asagu dhaley oo kale oo uu oggolaadey mas'uuliyadaha waalidka. Hadday sidaa tahay, markaa ka dib garsooraha ayaa eegi doona dakhliga Jason soo gala oo gooyn doona masruufka sida uu qabo *Xeerka Masruufka Ilmaha*.

Taageerista dhaqaale ee saygaaga/xaaskaaga

Sharciga labada qof ee xiriirka ka dhaxeeya wuxuu u arkaa sida iskaashi dhaqaale oo marka iskaashatada kala jabto shaqsiga haysta lacag badan ayaa laga yaabaa in uu taageero qofka kale. Isla markaana, sharciga wuxuu dadka waa weyn ka filayaa in ay isku dayaan in ay noqdaan qof isku kalsoon oo ay ayagu is daryeelaan sida ugu wanaagsan ee karaankooda.

Inta lagu jiro mudada guurka, badanaaba hal qof ayaa waqti badan ku kharash gareeya ilaalinta guriga iyo carruurta. Shaqsigaas ma haysto fursad uu shaqada kaga kasbado lacag badan, ama noqdo mid xirfad badan leh oo heysta shaqo farsamo ama shaqo xirfad oo lacag badan lagu qaato, ama uu ku bixiyo lacagta dhigaalka-howlgabka ee muddada dheer la bixiyo. Marka guurka uu dhamaado, qofkaas dhibaato dhaqaale ayuu ku jiraa.

Si loo go'aammiyo caddadka masruufka ay tahay in uu say/xaas uu siiyo kan kale, sharciga wuxuu leeyahay garsoorka waa in uu eegaa qofka masruufka weydiisanaya inta uu u baahan yahay si ugu noolaado, iyo shaqsiga kale inta uu awoodo in uu bixiyo. Qofka waxaa laga yaabaa in uu dalbado taageero dhaqaale si asiga ama ayadu dhaqaale ahaan u kaaftoomo ama uusan lugta la galin dhibaato dhaqaale ee weyn.

Guud ahaan, dadka muddo yar kaliya isqabey waxay taageero dhaqaale ay heli karaan muddo gaaban. Taageerada dhaqaale ee la siiyo qofka waxaa laga yaabaa in ay u suurto geliso in iskuul ama tababar shaqo uu/ay ku laabto/bato.

Dadka qaar sannaddo badan ka maqnaa shaqada ama ka shaqaynaayey shaqooyin lacag yar waxaa laga yaabaa in ay marnaba noqon karin kuwa dhaqaale ahaan isku filan. Saygooda/xaaskooda ayaa laga yaabaa in masruuf ay ka bixiyaan muddo dheer.

Waa kuwan waxyaabaha xisaabta lagu darsado

- Da'da iyo caafimaadka labada qof;
- Fursadaha shaqo ee jiraan;
- Guurka saameynta ay ku yeelatey fursadaha shaqo;

- tabarruca uu/ay ku sameeyey/sey daryeelka qoyska mudada ay is qabeen;
- tabarruca uu/ay ku sameeyey/sey xirfadda shaqo ee qofka kale,
- habnololeedka qoyska ka hor inta ay kala tagin;
- inta wakhti ee ay ku qaadaneyso shaqsiga in dhaqaale ahaan isku kalsoonaado; iyo
- baahida loo qabo in guriga la sii joogo si loo daryeelo carruur yar yar ama carruur wa weyn oo itaal-daran.

Waad isku af garan kartaan caddadka masruuf ee la bixin doono iyo muddada ay socon doonto tanina ku dar heshiiska kala go'idda . Haddii aad isku af garan weydaan, maxkamadda ayaad aadi kartaa una dayn karta maxkamaddu in ay go'aammiso.

Dhowaan qaar qareeno iyo garsoorayaal ah ayaa waxay billaabeen in ay tijaabiyaan xeerar la talinta masruufka labada isqaba qoraalkeeda koowaad Xeerarkan waxaa ku qoran qiyaas tiro ee inta caddad ee masruuf oo lagu saleeyo da'da qofka masruufka qaaanayo, muddada guurka uu jirey iyo masruufka ilmaha ee la siiyey ama ka maqnaa. Xeerarkan waxaa loogu tala galey in ay kaa caawiyaan in aad ku heshiisaan caddadka masruuf oo ku saleysan caddadka garsooreyaal ay uu ku abaal mariyey dacwooyin tan la mid ah. Xeerarka ka talinta masruufka labada isqaba weli qormo ayaa ku socota.

S ***Side baan u fahmi karaa ilaa cadadda masruuf ee aan weydiisan karo?***

J Waxaad u baahan tahay in aad qorto faahfahinno ku saabsan dakhligaaga iyo qarashkaaga. Tax inta aad ku kharashgareyso cuntada iyo kharakhhka waxyaabaha guriga ku baxa iyo waxyaabaha sida iibsashada daawada, biilka takhtarka ilkaha, dharka, dhaqidda dharka, timo jar, kharashka gaariga iyo caymiska, caymiska guriga, safarka fasaxa, haddiyadda, maaweelo, cuntada xayawaanka la rabbeysto iyo daawooyinkooda. Dhamman kharashyadaan oo dhan waa lagu dari karaa marka la doonayo in la fahmo caddadka masruuf ee la weydiisan lahaa. Sidoo kale qareenkaaga ayaad weydiisan kartaa in uu kuu sharraxo caddadka masruuf. Xeerarka ka talinta masruufka labada isqaba ee quseeya arrintaada.

S ***Aniga 55 jir baan ahay. Maxkamadda waxay saygaaga/xaaskaaga ku amartey in ay bil kasta i siiso $500. Hadda taasi way wanaagsan tahay, balse sicir-bararka jira iyo qiimaha waxkasta oo sare u kacaya, waxaan ka baqayaa 5 sano hadda ka dib in aysan igu filnaan doonin. Ma jiraa wax aan ka qaban karo?***

J Haa. Maxkamadda waxaad weydiin kartaa in ay amarka maxkamada ay ku darto oo ay ku hagaajiso qarashka maciishadda. Caddadka acagta masruufka waxay ku xiran tahay tilmaamaha cabbira isbedelka kharashka macaamiisha (Consumer Price Index) Masruufka lagu siiyo sannad kasta wuu isbeddelayaa si loogu cabbiro qiimaha sicir-bararka.

Xeerka Caadiga ee Labada qof

S ***Waxaan wada nooleyn ilaa iyo toban sano. Waqtigaas oo idil, guriga ayaan aniga joogey oo afarteenna caruurta ayaan daryeeli jirey. Haddii aan kala go'no, naf ahaanteyda masruuf ma heli karaa?***

J Masruuf ayaad weydiisan kartaa. Labada qof ee isku qabey Xeerka Caadiga waxay xaq u leeyihiin in ay masruuf weydiistan haddii ay isla degganayeen in ka badan seddex sannadood ama haddii ay wada deganayeen in ka yar seddex sannadood balse cunug isu dhaleen ama ay wada korsanaayeen.

Fulintaada bixinta masruufka

Bogga 56

Dhamman amarrada masruuf ee Ontario laga sameeyo waxaa si toos ah looga diraa Xafiiska Mas'uuliyada Qoyska (Family Responsibility Office (FRO). FRO waxay socodsiyaan howsha
bixinta masruufka xaaska/sayga iyo cunuga si looga caawiyo in la hubiyo in masruufka loo bixiyo si joogto ah oo tallaabo ayeyna ka qaaddaa dardar gelinta amarrada in masruufka la bixiyo oo aan la bixin walhtiga loogu talagalay ama aan si buuxda loo bixin

Masruufka oo si joogto ah loo jaro

Marka ay maxkamad qof ku amarto in uu si joogto ah masruuf u bixiyo, maxkamaddu waxay xataa samaysaa **amar masaruuf ka jarista.** Maxkamaddu waxay amarka masruuf ka jarista u dirtaa FRO FROna waxay u qoraan madaxa shaqada ee qofka(ama meesha uu dakhli ka soo galo) iyagoo u sheegaya madaxa shaqada in uu qofka mushaharkiisa ka jaro caddadka masruufka. Markaa waa in madaxa shaqada uu waa in uu lacagta u soo diraa FRO.FRO, markeeda, waxaa ay lacagta u diraysaa qofka ay maxkamadda ku magacawday masruufka. . Haddii arrimaha masruufkaaga lagu dejiyay heshiis qoys (heshiis guur, heshiis kala tag ama heshiis isla degid) ama heshiis waalidnimo,intii lagu dhammayn lahaa amar maxkamadeed,weli waad heli kartaa in masruufkaaga laga howl geliyo FRO Si aad taa u samayso waa in aad heeshiiskaaga qoys ka xaraysaa maxkamadda sida uy farayaan nidaamka *Xeerka Qoyska* iyo xeerarka maxkamadda.

Mar haddii heshiiska qoyska ama is afgaradka laga xareeyo maxkamadda, markaana waa laga xarayn karaa FRO FROna waxaa ay kuu soo ururin karaysaa masruufka

Ka noqoshada FRO

Dadka qaarkood ma doonayaan in lacagta masruufkooda loo soo maro FRO. Haddii labadoodaba **bixiyaha** (qofka masruufka lagu leeyahay) iyo **qaataha** (qofka qaata masruufka) ay isku af gartaan, FRO way iska dhaafi karaan. Tani waxay ku sameyn karaan ayagoo u dira Ogeysiin Kala Noqosho, ayadoo labada qofba saxiixaya, oo FRO u sheegaya in ay jecel yihiin in ay kala noqdaan dalabkooda masruufka, heshiiska qoys ama is afgaradkooda

Mar alla markii FRO ogeysiintan ay hesho kiiska way xiraysaa.. Hase-yeeshee, haddii qofka masruufka qaata uu cayr qaadanayo oo dalbka masruufka ay u xilsaarantahay hay'adda cayrta bixisa, sidoo kale hay'adda bixisa cayrta waa in ay ku raacdaa in FRO ay kala noqotaa dalabka masruufka. Waa in aad caddaysaa haddii hay'ad adeeg bulsho ay ku jirto iyo haddii oggolaanshahooda loo baahan yahay. Waxaad tan samayn kartaa adigoo buuxiya oona dira Confirmation of Assignment hay'adda adeegga bulsho. Hay/adda ayaa kuu sheegi doonta haddii ay ku jiraan.

Haddii bixiyaha uusan u hoggaansami waayo amarka masruufka, oo lagu leeyahay lacag masruuf, qofka qaataha ah wuxuu go'aansan karaa in uu kala noqdo FRO amarka masruufka ayadoon uusan kala heshiin bixiyaha dalabka masruufkana si toos ah ayuu u dar gelin karaa. Qofka qaataha ah wuxuu tan ku sameyn karaa assaga oo FRO u dira (Notice by Support Recipient of Unilateral Withdrawl form) oo saxiixan

Bogga 56

Mar haddii FRO ay hesho ogaysiintaan waxaa ay xiri doontaa kiiska qofka qaata ahna wuxuu xoojin karaa amarka masruufka .Haddii qaataha uu uu qaato cayr amarka masruufkana loo xilsaaro hay'dda cayrta bixisa,hay'adda bixisa cayrta waa in ay iyada xataa ay ku raacdo ka noqoshada amarka masruufka ee FRO.

Qofka qaataha iyo kan bixiyahaba w nno axaa laga qaadayaa gu$50.00 haddii dalabka masruufka mar kale laga xareeyo FRO.

Fulinta masruufka aanan la bixin waqtiga loogu tala galey ama si buuxda aan loo bixin.

Haddii dalabka masruufka aan laga xarayn FRO, lacagta masruufka laguugu leeyahana aan la bixin wakhtiga loogu tala galey ama si buuxda aan loo bixin, tallaabo sharci ayaad adiga nafsi ahaantaada qaadi kartaa si aad u hesho lacagta aad lagaa qabo. Waxaad awoodi kartaa:

- codsi dhegaysi, halkaasoo qofka masruufka bixinaayo laga doonaayo in garsoore uu u sharaxo sababta uu u bixin waayey masruufka. Haddii garsooraha uu ku qanci waayo sharaxaadaas, garsooraha wuxuu ku amri karaa in masruufka uu bixiyo. Marar dhif ahna, garsooraha wuxuu qofka masruufka laga doonaayey in uu bixiyo u diri karaa xabsiga maadaama uu ku guul dareystey in masruufka lagu leeyahay uu bixin waayey darteed.

- in qofka masruufka lagu leeyahay mashaharkiisa laga qabsado/gooyo oo madaxa shaqada uu u shaqeeyana maxkamadda la soo horjoojiyo haddii madaxa shaqada uu diido ama iska dhega tirt digniinta maxkamadeed;

- in qofka masruufka lagu leeyahay koontadiisa bangiga laga gooyo;

- qofka masruufka lagu leeyahay RRSP-ga/eeda lagala wareego;

- amarka masruufka loo diiwaan geliyo sidii uu yahay dembi lagu soo oogo qofka masruufka lagu leeyahay gurigiisa/geeda ama hanti maguurtada ama hantida shaqsi; ama

- amar qoraal ah lagula wareegayo hantida qofka masruufka lagu leeyahay.

Si aad talaabooyinkan sharciga ah aad maxkamadda u soo hordhigto waxaa laga yaabaa in ay waqti qaadato qaalina ay tahay markaa waxaa laga yaabaa in aad qareen aad u baahato ku caawiyo. Hase-yeeshee, adiga shaqsi ahaantaada ma ahan in aad fuliso amarka bixinta masruufkaaga. FRO ayaa ku matali karta ayagoo magacaaga ku hadlaya ayaa kuu soo celin karta masruufka lagaa qabo FRO

ayaa qaadi karta tallaabooyinka kor lagu soo xusey oo dhan si loo soo ururiyo lacagta masruufkaaga., FRO waxay qaadi kartaa tallaabooyinka kor ku qoran: Taa waxaa raacsan in FRO ay awooddo

- in ay codsato diiwaangelinta ay ku jirto macluumaadka ku saabsan bixiyaha shaqadiisa iyo xaalad maaliyadeed iyo cinwaan oo ka iman kara shaqsi ama urur shacab;

- in bixiyaha madaxa shaqada uu u shaqeeyo maxkamad ay horkeento diidmada iyo iska dhegatirka ay ku sameysey amarka masaruuf ka jarista; dartood

- in bixiyaha lacagta uu ku leeyahay dowladda dhexe (sida canshuurta celinta iyo Manaafacyada Ceymiska Shaqada (Employment Insurance);

- caddadka masruuf ee lagu leeyahay in ay wargeliso xafiiska deynta (credit bureau);

- in ay joojiso lacagta bakhtiyaanasiibka (lottery) ee ku guuleystey bixiyaha; haddii abaal marinta ay ka badan tahay $1,000 oo bakhtiyaanasiibka Ontario lagu ciyaarey;

- in qofka masruufka lagu leeyahay fasaxiisa/geeda baabuur wadista laga xannibo; ama

- laga xannibo fasaxa wadidda gaadiidka dawladda dhexe ama wixii dheeraad ah, sida wadidda diyaarada ama basaboorka Kanadianka.

Haddii aad ka noqoto FRO, dib ayaad u dalban kartaa amarka masruufkaaga, heshiiska idin dhexmarey ama is afgaradka haddii aad dhibaato kala kulanto lacagta masruufka goor dambe oo aad go'aansato in aad u baahato in FRO ku caawiso.

Waa in aad la socotaa in FRO ay qabato howl wanaagsan goorta aad xafiiska la socodsiiso isbedelka soo kordha. Markasta hubaal ku samee in FRO ay ogsoon tahay cinwaanka aad markaa degan tahay iyo talefoon lambarkaaga, iyo haddii aad ogaato in masruuf bixiyaha uu guurey/tey ama 'shaqo iska badaley/shey, waa in aad FRO la socodsiisaa, lacalla haddii masruuf bixiyaha uusan/aysan la soo socodsiin xafiiska.

FRO si ay wax ku ool ah u fulso bixinta masruufka, sidoo kale waxaa muhiim ah in amarkaa masruufkaaga,
Heshiiska qoys ama is afgarad labada idin dhexmara waa in si cad ah loo qoraa.
Macluumaad dheeraad oo arrintan ku saabsan, waxaa laga yaabaa in ay ku caawiso in aad eegto bogga internetka FRO oo ah http://www.theFRO.ca.

Kala qeybinta hantidaada

Sharciga wuxuu leeyahay in labada isqabta ay wadaagaan mas'uuliyadda daryeelka caruurta, maareynta guriga iyo shaqeystaan oo daqli soo galo mudada ay is qabaan. Sharciga sida uu qabo, guurku waa iskaashi siman. Guurka marka uu dhamaado, iskaashigana wuu dhamaadey oo hantida waa in la qeybiyaa.

Si loo garowsado tabarruca siman ee qofka kasta, xeerka guud waa in hanti kasta ee aad yeelateen mudada aad isk qabteen oo aad weli leedihiin goorta aad kala go'deen qiimaheedu waa in si siman loo qeybiyaa, 50-50. Hantida aad la timid markaad is guursaneyseen adiga ayaa iska leh goorta guurka uu dhamaado. Sare kac kasta ee ku yimaada qiimaha hantidan inta aad is qabteen waa in la wadaagaa.

Waxaa jira waxyaabo aanan ku jiran xeerarkan. Sharciga wuxuu kuu ogol yahay in aad haysato qaar ka mid ah hantida aad haysatey dhamaadka guurka. Hantidaan waxaa loogu yeeraa **hantida ka reeban.** Waxaa ka mid ah:

- haddiyadaha lagu siiyey inta aad is qabteen ee uu ku siiyey qof aanan ahayn saygaaga/xaaskaaga;
- hanti dhaxal ahaan laguu siiyey muddadii aad isqabteen;
- lacag aad shirkad caymis ka heshey qof geeriyoodey awgeed; iyo
- lacag aad heshey ama aad xaq u leedahay in aad hesho dhaawac shaqiyeed ku gaarey darteed, sida shil baabuur.

Hoyga reerkana waa mid ka baxsan xeerarka guud. Sharciga wuxuu leeyahay markii guurka uu dhammaado, qiimaha buuxa ee hoyga reerka waa in si siman loo wadaagaa xataa haddii qof kaliya uu lahaa guriga ka hor inta aadan is guursan, haddiyad ama dhaxal ahaan uu u helay guriga.

Sida ka duwan noocyada kale ee hanti, adiga kaligaaga ma lahaan kareysid qiimaha guriga uu joogey goorta aad isguursaneyseen.

Adiga iyo saygaaga/xaaskaaga waxaad isku af garan kartaan in aad si duwan u qeybsataan. Ama, mararka qaarkood, waxaad maxkamadda weydiisan kartaan in si duwan loo qeybiyo. Maxkamadda marka kaliya aad hantida si duwan u qeybin karto waa mar ay xaaladu gaar tahay oo haddii 50-50 loo qeybiyo ay aad xaq ugu ahayn labada qof midkood.

Xeerarka sharci ee loo baahan yahay in aad raacdo s loo xisaabiyo iimaha hantidaada iyo u kala qaybinta adiga iyo saygaaga/xaaskaaga waxay noqon kartaa mid adag. Waxaa fikrad wanaagsan ah in aad qareen la tashataan waxa sharciga uu ka qabo kiiskaaga.

Qeybta kale ayaa wuxaa ay ku siin doona fikrad ah sida sharciyadan u shaqeeyaan. Xusuusnow in tani ay tahay qeexitaan xeerarka guud oo kaliya. Waxaa laga yaabaa in ay jiri karaan xeerar kale iyo kuwo khaas ah oo lagu dabaqi karo kiiskaaga.

Tan ugu horeyso ee adiga iyo saygaaga/xaaskaaga la idinkaga baahan yahay waxay tahay waa in si kala goonni ah u xisaabtaan qiimaha guud ee qeybtaada ee hantida qoyska sida xeerka uu dhigaayo. Adiga waa in aad qof caddaalad iyo aammin goorta aad tan samayneyso. Haddii aad maxkamadda aaddo, waa in aad diyaarisaa warbixin maaliyadeed oo buuxda oo ah dhammaan hantidaada, deeymankaaga iyo dakhligaaga. Waa in aad ku dhaarataa in kuwaasi yihiin kuwo sax ah.

Hantida qoyska ee qeybtaada waad xisaabi kartaa adiga oo raacaya Talaabada 1-4 ee hoose ku qoran:

Talaabada 1 aad: Soo ogow qiimaha hantida ee aad la hayd maalinta aad kala go'deen

- Hantidaada waa wax kasta oo magacaaga ku qoran ama adiga aad leedahay.
- Waa in aad ku taxdaa dhammaan hantidaada, oo ay ku jirto hantida kuu taalla waddanka qaybihiisa kale iyo aduunka intiisa kale. Tusaale ahaan, taxidda hantidaada

waxay ka koobnaan kartaa gurigaaga, ganacsigaaga, gaari, saabaan, qalabka samaacada, dharka, qalabka isboortiska, majoowharaad, koontada bangiga iyo qorshaha kaydka ee howl-gab, iyo xaqqa aad u leedahay daqliga howl-gabka, xittaa haddii daqliga howl-gabka aad sanayaal kaddib aad heli doontid.

- Haddii aad isla hanti wada leedihiin oo magacyadiina ku wada qoran yihiin, midkiinba ha ku qoo liiska nus ah qiimaha hantida.

Talaabada 2 aad: Ka jar qiimaha dayn ee laguugu lahaa laga bilaabo maalinta aad kala go'deen

- Lacagta kaararka deynta lagy qaato ay kugu leeyihiin, lacagta ka hartey bixinta deynta guriga iyo tan baabuurka ayaa ka mid tusaalooyinka daymaha.

- Meel ku tax qiimahooda maalinta aad kala go’deen.

Talaabada 3 aad: Ka jar qiimaha hantida ee sharciga kuu ogol yahay in adiga aad haysato

- Hantidaan waxaa ka mid ah haddiyadaha iyo waxyaabaha aad dhaxal ahaan uga heshey qof aanan ahayn saygaaga/xaaskaaga inta aad is wada qabteen, lacag aad ka heshey shirkad ceymis ah qof geeriyoodey awgeed, iyo lacag aad haysato ama xaq u leedahay in aad ka hesho dhaawac ku soo gaarey awgeed.

Talaabada 4 aad: Ka jar qiimaha hanti ee aad la timid marka aad is guursaneyseen oo dhiman qiimaha daymaha

- Isku dar dhammaan qiimaha hanti ee aad la hayd goorta aad is guursateen.

- Ha ku darin guriga qoyskaaga, xataa haddii aad lahayd guriga maalinta aad is guursateen.

- Ka jar dhammaan wixii daymo ee laguugu lahaa goorta aad is guursateen.

Tallaabada 1-4 oo kooban:

Wakhtigaaad kala tageyseen qiimaha hantida (Tallabadaa 1 aad)	*Ka jar*	Waqtigaad kala tageyseen qiimaha daymaha (Tallabadaa 2 aad)	*Ka jar*	Hantida ka reeban (Tallabadaa 3 aad)	*Ka jar*	Waqtigaad is guursanaysee n qiimaha hantida oo laga jaray (Tallabadaa 4 aad)
= hantida qoyska qeybta adiga kugu soo aaddey						

Tallaabada ugu dambeyso waxay kuu sheygeysaa haddii midkiina midka kale wax lacag ah uu ku leeyahay.

Talaabada 5 aad: Ogow haddii lacag aad ku leedahay

- Is bar bar dhig qiimaha hantida guriga ee adiga kugu soo aadey iyo kan saygaaga/xaaskaaga ku soo aaddey.
- Caddadka yar ka jar caddadka badan.
- Faraqa u dhaxeeya 2 u qeybi. Tani waa caddadka sayga/xaaska qaybta dheeraadka ah ku soo aadey oo waxaa markaa looga bahan yahay in uu siiyo sayga/xaaska ku soo aadey qeybta caddadka yar.
- Lacagtan la bixinaayo waxaa loogu yeeraa **lacag bixinta laysla ek'eysiiyo (qualizing payment)**

OGOW: Haddii shaqsi uu leeyahay dayn ka badan hantida la siiyey, qiimaha inta isaga ama ayadu ku soo aaddey ee hantida qoyska waa eber.

Tusaale ahaan, haddii bangiga uu kugu lahaa $15,000 goorta aad kala go'eyseen, oo aad lahayd $8,000 oo kaliya, qiimaha hantida qoyskaaga waa $0 ula jeeddada xisaabinta lacag bixinta laysla ek'eysiiyo darteed.

Tusaale ahaan: George iyo Maria

George			Maria
$47,000	**Tallaabada 1 aad:**	Soo ogow qiimaha hantida aad lahayd maalinta aad kala go'deen	$12,000
-8,000	**Tallaabada 2 aad:**	Ka jar qiimaha dayn ee laguugu lahaa laga billaabo maalinta aad kala go'deen	-2,000
-4,000	**Tallaabada 3 aad:**	Ka jar qiimaha hantida ee sharciga kuu oggol yahay in adiga aad haysato	
-18,000	**Tallaabada 4 aad:**	Ka jar qiimaha hanti ee aad la timid marka aad is guursaneyseen oo dhiman qiimaha daymaha	-8,000
$17,000	**Qiimaha Guud ee hantida qoyska waa**		**$2,000**

Tallaabada 5 aad: Ogow haddii lacag laguugu leeyahay

$17,000 (caddadka badan) - $2,000 (caddadda yar) - $15,000

$15,000 ÷ 2 = $7,500

Geoge waa in uu bixiyaa lacag bixinta laysla ek'eysiiyo oo dhan $7,500 ee uu siinaayo Maria si ay labadoodaba u soo harto isla caddaka, $9,500

S ***Xisaabisteenu waxay sheegeysaa in aan anigu xaq u leeyahay in la i siiyo lacag dhan $5,000. Tani ma naqdi ahaan baan u helayaa?***

J Daruuri ma ahan. Lacagta ayadoo naqdi ah ayaa la bixin karaa. Sidoo kale waxaa laga sameyn karaa adiga oo lagu siinayo hanti u dhigmata $5,000. Ama, lacagta waxaa laguu dhigi doonaa mid lagu bixinaayo kirada ama lacagta daynta guriga ee bil kasta ilaa laga qarash gareynaayo $5,000. Sida loo bixin lahaa lacagta waa mid ka mid ah waxyaabaha aad idinka habayn kartaa oo aad ku qori kartaan heshiiska kala go'idda. Ama, waa mid ka mid ah waxyaabaha maxkamada ay go’aammin doonto.

S ***Midkeennaba waxaan u wada tagney qareen oo macluumaad iyo talo ku saabsan sharciga wuxuu ka leeyahay sida loo qeybin lahaa hantida qoyskeena, sida loo qeybin lahaa ayuu na soo siiyey. Hadda heshiis ayaan ka gaarney waxyaabaha. Heshiiska kala go'eenna si ka duwan sida sharciga uu leeyahay ma loo qeybin karaa?***

J Haa. Heshiiska kala go'a sida aad dooneysaan ayaad hantidiinna u wada qeybsan kartaan. Ka hor inta aadan saxiixin heshiiska kala go' midkiinnaba waa in aad qareen u gooni ah uu u tagaa oo eegaa heshiiska. Wakhti dambe si sahal ah uma beddeli kartaan heshiiska kala go'a.

S ***Haddiyad ahaan ayaa aabbahay baabuur ii siiyey. Waan ogahay in sharciga uu leeyahay in haddii aan kala go'no, ma ahan in aan la wadaago haddiyadaha aan helay inta aan isqabney. Waxaan go’aansaday in aan iibiyo baabuurka. Mar alla markan iibiyo gaariga, lacagta aan ka helo ma waxay qeyb ka tahay hantida layga doonaayo in aan la qeybasado saygaaga/xaaskaaga haddii aan go’aansanno in aan kala go’no?***

J Daruuri ma ahan. Haddii lacagta aad meel goonni ah ku hayso, tusaale ahaan , sida (savings bond), sidaas dardeed dib ayaad raadraaci kartaa kartaa iibsiga gaariga, waa laga saarayaa hantida aad qaybsanaysaan guurka marka uu dhammaado.

Waxaa jira mid muhiim ah oo ka reebban xeerkan guud ee saameeya hoyga qoyska. Haddii lacagta kasoo gashey iibsiga gaariga u isticmaasho in aad ku bixiso daynta guriga ama in aad ku dayactirto hoyga qoyska, waa in aad saygaaga/xaaskaaga la wadaagtaa qiimaha buuxa ee hoyga qoyska haddii aad kala go’dan. Mar alla marka lacagta la geliyo hoyga qoyska markaa waa in la wadaagaa, xataa haddii lacagta ka timaado haddiyad ama dhaxal ama hanti kale oo sharciga uu dhahayo in aadan u baahneyn in aad saygaaga/xaaskaaga la wadaagto.

S ***In guurkeenu dhammaado waa qalad ka yimid dhanka xaaskeyga. Ayada ayaa billowdey qof kale in ay is arkaan oo waxay go'aansatey in ay furriin i weydiisato. Waa maxay sababta aan hantidayda ula wadaagaayo ma in ay qofkaasi kale la qeybsato baa?***

J Marka guurka uu dhamaado saygaaga/xaaskaaga xiriirkeeda/kiisa cussub wax saameyn ah kuma laha qeybsiga hantida. Sharciga ka hadlaya qeybinta hantida qoyska waxba kuma laha sababta uu guurkaaga u dhammaadey. Sharciga wuxuu guurka u arkaa in uu yahay iskaashi siman. Goorta uu dhamaado, manaafacyada maaliyadeed ee iskaashiga waa in si siman oo xaq ah loo qeybiyaa. Xisaabinta waxaa la sameeyey ayadoon la eegeyn qofka qaladka iska leh ama qofka lagu eedeeyey.

S ***Seygeygu wuxuu 32 sanadood bixinaayey dhigaal-howlgabka shirkada. Intaana guriga ayaan joogey oo carruurta ayaan ilaalinaayey, shaqooyin aan isdaba joog ahayn ayaan ka shaqeeyaa oo lacagooedu iska yarayd. Haddii aan kala go'no, ma xaq baan u leeyahay in aan la wadaago lacagtiisa howl-gabka?***

J Haa. Badanaaba, qof xirfaddiisu tahay la taliye maaliyadeed ama qofka howshiisu tahay qiimeynta/xisaabinta caymiska ayaa eegaya saygaaga/xaaskaaga dhigaal-howlgabkiisa/keeda si loo ogaado lacagta qiimaheeda. Caddadkan waxaa lagu darayaa saygaaga/xaaskaaga qaybtiisa/teeda hanti ee qoyska. Ama, adiga iyo saygaaga/xaaskaaga waxaad ku heshiin kartaan goorta uu billaabo in uu qaato lacagtiisa howl-gabka, in aad boqolkiiba wax aad heli doonto. Waa in aad qareen u tagtaa si loo hubiyo in waraaqaha si qaabeysan loo hagaajiyo.

Muhiim: In mar alla markii aad kala go'daan, markaas wixii ka dambeeya sharciga howl-gabka idin ma aqoonsana in aad tihiin laba is qaba. Tusaale ahaan, haddii saygaaga/xaaskaaga geeriyoodo/to marka aad kala go'daan ka hor, balse ka hor inta aadan heshiis wada gaarin, wax xuquuq ah uma lihid manaafaca qofka haray. Waa in aad hubisaa in heshiiskaaga ama ammarka maxkamad ay ku caddahay xuquuqda aad ku leedahay lacagta howl—gabkiisa.

S ***Xagaagii la soo dhaafey, aniga iyo walaalkey guri dheeri ah ayaan gurigeyga ka dhisney. Qarashka dheeriga ee ku kacay waxay ahayd $10,000 oo qiimaha guriga wuxuu ku soo saa'idiyey $20,000. Hadda aniga iyo xaaskeyga waan kala tageynaa. Dib ma u heli karaa $20,000?***

J Maya. Waa in aad saygaaga/xaaskaaga la wadaagtaa qiimaha buuxa. Waxba tari mayso haddii lacag badan dhigtay ama aad guriga ka shaqeysayba. Waxaa jira waxyaabo aad u xaddidan ee aanan quseyn xeerkan.

S ***Waalidiinteyda ayaa guriga iigaga tagey marka ay dhinteen. Labada sanadood ee la soo dhaafey saaxiibkeyga ayaan isla wada degganeyn. Waxaan qorsheyneynaa in aan is guursano oo aan qoyskenena halkan ku korinno. Haddii guurkeenu noqdo mid shaqeyn waayo, ma doonayo in guriga isaga iigaga lumo. Heshiiskeenna guurka malagu qori karaa wax kasta oo dhacaba in guriga aan aniga iska leeyahay?***

J Haa. Heshiiskaaga guurka wuxuu oran karaa in aad adiga iska leedahay guriga iyo qiimahiisa goorta aad isguursaneyseen, oo qiimo kasta oo *ku kordha* guriga inta aad is wada qabtaan, adiga ayaa iska leh. Balse, saygaaga/xaaskaaga sida adiga oo kale xaq siman ayay ku leeyihiin in ay sii joogaan hoyga qoyska haddii guurkiinna uu dhammaado. Kuma qori kartid heshiiskaaga guurka tani mid beddesha.

Haddii guurkaaga dhammaado, waxaa laga yaabaa in saygaaga/xaaskaaga uu joogi karo guriga ilaa aad ka heshiineysaan, ama maxkamadda ay ka go'aamineyso qorshooyin kale.

S ***Waxaan ku nool nahay beerta xoolaha oo weyn. Beerta oo dhan ma waxaa loo tixgelinayaa in ay tahay hoyga qoyska?***

J Maya. Hoyga qoyskaaga waxa kaliya ay qeyb ka tahay halka aad ku nooshay, hoyga iyo hareeraha yar ee ku wareegsan. Qeybta kale ee beerta waa hanti sida hanti kale oo kasta. Oo laguma xusin xeerar gaar ee hoyga qoyska.

S ***Aad baan uga xanaaqsan nahay wa xkastaaba. Waqtiga hadda la joogo ma awoodi karo in aan fuliyo oo aan sameeyo qoraallo hantideyda ku qoran. Tani ma in aan haddeertaan sameeyaa?***

J Waxaad heysataa ilaa iyo lix sannadood laga bilaabo maalinta aad kala go'deen in aad maxkamad ku aaddo oo aad weydiisato go'aan ah caddadka lacag bixinta lays la ek'eysiiyo. Furriin haddii aad hesho, waxaa laga yaabaa in wakhtiga kugu yaraado. Waxaad heysataa ilaa iyo lix sannadood laga bilaabo maalinta aad kala go'deen, ama laba sannadood laga bilaabo taariikhda furiinkaaga noqday kama dambeys, aad maxkamadda aaddey, taariikhda ay doonto ha soo hormartee.

S ***Waxaan ka wal walayaa madaama aan hadda guurey, dhammaan hantida qoyskeyga la waayo ka hor inta aanan fursad u helin in aan arrimaha kala xallinno. Waxay ila tahay in seygeyga laga yaabo in alaabta oo dhan uu ka takhalluso si uu iiga ilaaliyo in aan aniga la wadaago qiimahooda. Ma jiraa wax aan ka qaban karo?***

J Haa. Maxkamadda ayaad aadi kartaa oo aad weydiisan kartaa in ay joojiso in saygaaga/xaaskaaga hantida sii bixiso/uu bixiyo. Maxkamadda waxaa laga

yaabaa in ay ku tiraahdo in uusan iibin ama xoorin hantida ama maxkamadda waxay ku amri kartaa in qof kale loo dhiibo si uu u xafido.

Xeerka Caadiga ee Labada qof

S ***Anagu isma qabno balse 15 sanadood ayaan wada deggan nahay. Haddii aan kala go'no, ma in aan qeybsannaa qiimaha hantideenna?***

J Waa laga yaabaa. Labada isqabta ayaa ah kuwa kaliya ee xuquuq sharciyaysan u leh qiimaha hantida qoyska nuskeeda. Waxaad saygaaga/xaaskaaga aad weydiisan kartaa in ay dib kuu siiso waxa aad kaga dartey hantida ee ay hadda saygaaga/xaaskaaga leeyahay/leedahay. Haddii saygaaga/xaaskaaga kugu raacin taa, maxkamad ayaad aadi kartaa si dacwaddaada aad u gudbiso. Balse dacwaddaas waxay ku saleysnaan doontaa qeyb kale oo ka mid ah sharciga, oo ma noqon doonto xeerka qoyska. Qareen waydiiso inuu kula taliyo.

Qeybinta hantida marka uu/ay geeriyoodo/geeriyooto seygaaga ama xaaskaaga

Sharciga qaabbilsan kala qeybinta hantida qoyskaaga goorta kala tag dhacdo ayaa loo isticmaali karaa si loo qeybiyo hantida qoyskaaga kaddib markuu seygaaga ama xaaskaaga dhinto/dhimato. Waxaa laga yaabaa in saameynta tani uu manfac ku jiro.

Waxaad haysataa lix bilood laga bilaabo wakhtiga geerida seygaaga ama xaaskaaga in aad maxkamadda ka fayalgareyso dokumenti dhahaya in aad jeceshahay in aad isticmaasho sharciyadan in lagu qeybiyo hantida qoyskaaga. Waa in aad qareen aragtaa ka hor inta aadan go'aan gaarin.

Haddii dardaaran uu jiro

Haddii seygaaga ama xaaskaaga uu geeriyoodo/ay geeriyooto ayada/asaga oo ka tagey dardaaran dhahaya sida hantidiisa/hantideeda loo qeybin lahaa, wax baad kala dooran kartaa. Waxaad awoodi kartaa
in aad qaadato hantida kuu soo hartey ee dardaaranka ku qoran *ama* waad kala qeybin kartaa hantida qoyskaaga adiga oo isticmaalaya xeerar la mid ah kan quseeya kiisaska kala go'a.

Isticmaalka xeerarkan waxaa laga yaabaa in dhaqaalahaaga faa'ido u tahay haddii seygaaga ama xaaskaaga hantida badankooda u dhaafo/u dhaafto xubno kale ee qoyskaaga ama dad kale.

Waa in aad sameysaa qoraal ku qoran dhammaan hantidaada isla sida aad u qori lahayd goorta aad seygaaga/xaaskaaga kala go'daan. Waa in aad qiimeysaa hantidaada adiga oo ka soo xiganaayo inta ay u qalantay hal maalin ka hor inta seygaaga ama xaaskaaga uusan geeriyoon/aysan geeriyoon.

Haddii dardaaran aan la qorin

Haddii seygaaga ama xaaskaaga geeriyoodo/to dardaaran la'aan, waxaa jira sharci gaar ah, *Xeerka Dib Ubahaynta Sharciga Sii joogaha (Succession Law Reform Act),* kaasoo oronaya sida hantida loogu qeybin lahaa qoyska intiisa kale ee nool.

Waad oggolaan kartaa qeybinta hantida sida laga soo xigtey sharcigaas, ama waad kala qeybin kartaa hantida adiga oo isticmaalaya xeerarka quseeya kala go'a.

Xaqa aad ku leedahay joogitaanka hoyga qoyska

Haddii seygaaga ama xaaskaaga uu iska lahaa/ay lahayd hoyga qoyskaaga oo uu qof kale uga tago/tagto, qofkaas ma sheegan karo gurigaaga maalinta seygaaga ama xaaskaaga geeriyoodo/geeriyooto maalinta xigta. Muddo 60 maalmood ayaad waxaad xaq u leedahay in aad sii joogto hoyga qoyskaaga. Inta lagu sii jiro muddadaan ma ahan in aad kiro bixiso.

Weli sii qaadasho masruuf marka uu bixiyaha geeriyoodo kaddib

Heshiiskaaga qoys ama is afgaradka wuxuu oran karaa hantida saygaaga/xaaskaaga hore waa in uu ahaadaa mid sii wadda in la sii wado in masruuf lagu siiyo marka uu geeriyoodo ama ay geeriyooto k ddib.

Heshiisyada masruufka ee dhaceen ka hore 1 Maarso, 1986 ama hoos yimaaddaan *Xeerka Furriinka* waa in masruufka laga bixiyaa hantida qofka kaliya haddii heshiiska qoyska, is afgaradka ama amarku uu oronaayo waa in ay sii socotaa bixiyaha marka uu geeriyoodo kaddib.

Haddii aad qaadaneysey masruuf oo hoos imaanayey amar maxkamadeed hoos imaanaya X*eerka Sharcga Qoyska* (1 Maarso, 1986 ama kaddib), hantida saygaaga/xaaskaaga hore waa in uu/ay sii waddaa in ay/u bixiyo/so masruufka, haddii ay maxkamaddu si kale ammarto mooyee.

Haddii ammarka laguugu amarey uu hoos imaanaayo *Xeerka Furniinka* oo uusan oran in bixinta masruufkaaga uusan sii socon bixiyaha marka uu geeriyoodo kaddib, ama haddii aadan ogeyn nooca ammar ee maxkamaddu kuugu amartey ee aad haysato, waa in aad qareen la tashataa.

Xafiiska Mas'uuliyada Qoyska (Family Responsibility Office (FRO) ma dardar gelin karo amarka masruufka ee lagu leeyahay bixiyaha hantidiisa/teeda kaddib marka FRO la ogeysiiyo geerida bixiyaha.

S ***Goorta ay xaaskeyga geeriyootey, waxaan heley manfac lacag oo aan ka heley shirkaddeeda ceymiska nafta. Waxaan lacagta u isticmaaley in aan ku bixiyo qarashka duugta. Maadaama aan hadda helay fursad aan waxyaabaha ku kala ogaado, waxaan jeclahay in aan kala qeybiyo hantida qoyska aniga oo isticmaalaya xeerarka quseeya qeybsiga hantida qoyska goorta kala go' yimaado. Ma goor dambe baa?***

J Maya Weli waad isticmaali kartaa xeerarka quseeya kala qeybinta hantida qoyska marka aad kala go'daan. Lacagta ay caymiska bixiyeen waa in aad ka jartaa lacag bixinta laysla ek'eysiiyo oo aad ka heli doonto hantida saygaaga/xaaskaaga, ka eheyn haddii ay qoraal ku caddaysay, in aad heli doonto lacagta ka timaada caymiska iyo lacag bixinta laysla ek'eysiiyo. Waxaad weydiisan kartaa hantida qofka uu ka tagey in laguu soo celiyo qarashka duugta.

III. GACAN KA HADAL QOYS KA DHEX DHACA

Gobolkan Ontario looma-dulqaato **Xadgudubka qoyska.** Dhammaan dadka reer Ontario waxay xaq u leeyihiin in ay guryahoodu iyo jaaliyadahoodu ammaan ku dhex dareemaan. Inkastoo ragga iyo dumarkaba labadoodaba noqon karaan dhibbanayaal xadgudubka qoyska dhex mara, badanaaba caddad fara badan oo xadgudubyadaas ayaa ah mid ragga ay ku xadgudaan dumarka. Rabshada waxay dhibbahanaha ku reebi kartaa waxyeelo aan dhammaad lahayn caruurtana waxay ku reebtaa masiibo.

Bogga 59

Hanaibaadda, jugta, haraantida, feerka, riixista, dabagalka iyo kadeedinta shaqsi kale waa dambi. Sidoo kale waa dembi in loo galmoodo qof aan dooneyn in loo galmoodo. Tani waxba kama baddeleyso haddii aad is wada qabtaan. Shaqsiga falaya falalkan waa la qaban karaa, dembi ayaa lagu soo oogi karaa, oo dembigana lagu qaadi karaa oo kadibna waa la xiri karaa. Sidoo kale xadgudub maskaxeed, dareen iyo maaliyadeed ma ahan mid loo dulqaadan doono, inkastoo *Xeerka Dembiyada ee Canada* aysan kuwaasi aysan dembiyo ka ahayn. Haddii adiga ama carruurtaada aad la kulantaan mid ka mid ah noocyadan xadgudub, keligiin ma tihidiin. Waxaa jirta caawinaad idiin diyaar ah. Haddii laguu hanjabaayo jirdil ama galmo, u wac boliiska. Haddii aadan jecleyn in aad u wacdo boliiska, ama ku haysto xadgudub nooc kale ah, waxaa jaaliyaddaada ka heleysaa ilo aad caawinaad ka heli karto. Qaar ka mid ah ilahaas waxay ku qoran yihiin buug-yarahaan gadaashiisa. Qareen kala hadal waxa aad ka sameyn karto si naftaada iyo caruurtaadaba u difaaci lahayd. Sidoo kale waxaad la hadli kartaa takhtarkaaga, dadka jooga xarunta macluumaadka jaaliyaddaada ama xarunta caafimaadka jaaliyadda. Way ogyihiin adeegyada laga helo jaaliyaddaada ee caawin kara adiga iyo caruurtaadaba. Takhtarkaaga ayaa daryeeli kara dhawacyadaada oo faylkaagana ku qori kara waxa ku soo gaarey. Diiwaangelintan maxkamadda ayaa loo isticmaali karaa in garsooraha loo caddeeyo in adiga wax laguu geystey.

(The Assaulted Women's Helpline) waa adeeg talefoon ah oo loogu talagey rabshadda oo gobolladoo idil ka shaqeeyo 24 saacadood maalintiiba, toddoba maalmood toddobaadkii Lataliyayaal u tababaran ayaa ku caawinaya oo ku siinaya fursado aad wax ku kala dooran karto, oo ku siin doona macluumaad ku saabsan taageerada aad ka heli karto degmada aad deggan tahay sida hoy iyo xarumaha dadka la dhibaateeyey kana caawin doona qorshe badbaado degdeg ah. Tarjumayaal ku hadla ilaa 150 luqadood ayaa diyaar ah in ay u jawaabaan kuwa soo waca. Wac 1-866-863-0511 ama, Toronto nawaaxigeeda, 416-863-0511. TTY 1-(866) 863-7868

Bogga 59

Taa waxaa raacsan, waxaad soo wici kartaa Khadka Gargaarka Dhibbanaha (Victim Support Line (VSL)) oo ah 1-888-579-2888. Inkastoo kan uusan ahayn qatka rabshadda, Shaqaalaha VSL way kaa caawin karaan ayagoo kugu hagaajinaya adeegyada gargaarka jaaliyadda aad degan tahay ee kugu habboon. Wacaya waxay xataa heli karaan macluumaad duuban oo ku saabsan sida nidaamka Caddaaladda dembiyada u shaqeeyo, laga bilaabo marka qofka la soo qabto, marka xukunka lagu ridaayo ilaa iyo hanaanka loo maro soo deyntiisa/teeda. Haddii saygaaga/xaaskaaga xadgudub kugu sameeyey oo hadda xabsiga gobolka uu ku jiro, VSL ayaad waci kartaa oo waxaad iska diiwaan gelin kartaa Nidaamka Wargelinta Dhibbanaha (Victim Notification System) si aad macluumaad ugu hesho taariikhda la soo deyn doono qofka dhibka geystey. Haddii dacwaddaada la geeyo maxkamadda dembiyada, waxaa jaaliyado badan ka jira xafiiska Barnaamijka Taageerada Dhibbanaha/Markhaatiga ah (Victim/Witness Assistance Program) oo kaa caawinaya hannaanka maxkamadda. Sidoo kale jaaliyaddaada waxaa laga yaabaa in ay leedahay barnaamijka Maxkamadda ee ku Xadgudub Qoyska. Marka aad qeyb ka noqoto barnaamijkan, waxaa heli doontaa macluumaad iyo taageero aad ka heli doonto shaqaalaha Barnaamijka Taageerada Dhibbanaha/Markhaatiga. Taa waxaa raacsan, garsooraha waxaa laga yabaa in dembiilaha ku amro in uu iska xaadariyo 16-toddobaad barnaamij waxbarasho oo khaas ah iyo barnaamij la talin ah. Waxaa muhiim ah in aad jaaliyaddaada ka hesho ilo. Haddii aad u baahato in aad gurigaaga ka tagto oo aadan lacag ama hoy aad haysan, waxaa laga yaabaa in aad hesho taageero bulso, hoy, caawimaad xagga kharashka qareenka iyo la talin bilaash ah.

S ***Habeenkii kale guriga waan ka tagey markii saygayga/xaaskayga xadgudub igu sameynayay. Qof saaxiib aan nahay ayaa igu yiri maadaama aan soo cidleeyey carruurta, saygayga/xaaskayga ayaa xannaaneyntooda lahaan doona haddii aan maxkamad aan aadno. Taasi ma run baa?***

J Maya. Haddii aad ka tagto saygaaga/xaaskaaga oo xadgudbe ah, waxaad xaq u leedahay in aad weydiisato xannaaneynta caruurtaada iyo taageero adiga iyo ayagaba. Xaquuqdan kaaga ma lumayso maxaa yeelay adiga ayaa ahaa qofka guriga ka tagey. Garsoore ayaa eegaya waxa u wanaagsan oo dan u ah caruurta goorta uu go'aamminaayo qofka la siin lahaa xannaaneynta carruurta. Garsooraha la socodsii in saygaaga/xaaskaaga xadgudub kugu sameynaayey. Garsooraha wuu ku xisaabtamayaa in haddii shakhsiga uu rabsho ama xadgudub ku sameynaayey saygooda/xaaskooda ama carruurtooda goorta uu go'aamminaayo qofka la siin lahaa xannaaneynta iyo helidda carruurta. Hase-yeeshee, waxaa kuu muhiimsan in aad isla markiiba u tagto qareen oo goor dambe aad ka wal washo su'aasha ah qofka xannaaneyn doona carruurta. Haddii carruurtaada ay saygaaga/xaaskaaga la noolaayeen oo ay adigu muddo aysan kula nooleyn, garsooraha waxaa laga yaabaa in uusan dooneyn in uu wax ka bedelo xaaladaddooda nololeed. Xataa haddii aad ka tagto carruurtaada, waa in arrinta xannaaneynta aad la tacaashaa sida ugu dhaqsaha badan.

Sharciyada dhibaneyaasha lagu xadgudbay

Waxaa jira sharciyo adiga iyo carruurtaada ka difaaca rabshadaha.

Amarada helista

Garsoore waa in uu qorshahiisa gashadaa haddii shaqsiga uu ahaa qof rabsho badan iyo xadgudub badan goorta uu qorsheynaayo kartida shaqsiga uu ku daryeeli karo cunug. Sharciga ilaalista caruurta ee Ontario wuxuu caruurta ka ilaaliyaa waxyeelleyn jir, fara-xumeyn iyo mid dareenba. Waxaa laga yaabaa in dhaqankan uu sidoo kale noqo kara dembi. Haddii cunuggaaga yahay dhibbane xadgudub uu ku sameeyey waalidkiisa kale, waxaad maxkamadda weydiisan kartaa in waalidka kale loo diido in la siiyo ama loo oggolaado in uu helo carruurta ayada oo lagu kormeerayoe.

Amar xakamaynaya qofka

Shaqsiga ah dhibane gacan ka hadal guri loogu geystey wuxuu maxkamadda weydiisan karaa in ay maxkamadda amarto amarka xakamaynta. Waa fikrad wanaagsan in qareen lala hadlo haddii aad weydiisaneyno amarka xakamaynaya qofka. Amarka xakamaynaya qofka wuxuu noqon karaa mid guud ah – in saygaaga/xaaskaaga uu meel fog kaa joogo – ama wuxuu noqon karaa mid gaar ah. Wuxuu oran karaa in saygaaga/xaaskaaga uusan iman karin gurigaaga, goobtaada shaqo, iskuulka carruurtaada ama goobo kale oo badaanaaba aad aado (Tusaale ahaan, goobta aad wax ku caabbuddo ama guriga waalidiintaada). Amar xakamaynaya qofka waa in la siiyaa saygaaga/xaaskaaga sida ugu dhaqsaha badan, balse ma ahan adiga in aad u geyso oo aad siiso amarka xakamaynaya. Waxaa habboon in qof kale uu siiyo amarka xakamaynta. Haddii taasi ay suurto gal ahayn, shaqaalaha maxkamadda ayaa kaa caawin doona. Haddii saygaaga/xaaskaaga diido amar xakamaynaya assaga, waxaad u wici kartaa boliiska. Boliisku wuxuu u baahnaan doonaa in uu arko warqadda amarka xakamaynaya. Mar kastaaba hayso warqaddaas. Sidoo kale waxay ku weydiin doonaan in haddii saygaaga/xaaskaaga og yahay amarka xakamaynaya ee ay maxkamaddu ku amartey. Haddii boliiska aamminsan yahay in saygaaga/xaaskaaga iska dhega tirey amar xakamaynaya , assaga ama ayada waa la xiri karaa.

La’haansho gaar ah ee hoyga qosyka

Hhaddii aad is qabtaan, maxkamaddu waxaad weydiisan kartaa in ay xaq kuu siiso in aad ku noolaato hoygaaga oo saygaaga/xaaskaaga uu ka baxo. Xaq siman ayaad u leedahay in aad sii joogto gurigaaga xataa haddii guriga uu ku qoran yahay magaca saygaaga/xaaskaaga. Waxaa fikrad wanaagsan ah in aad la hadasho qareen haddii aad weydiisaneyso amar ah in adiga la'haansho gaar ah ee hoyga qosyka laguu siiyo. Haddii aadan isqabin, sidoo kale maxkamaddu waxaad weydiisan kartaa in aad sii joogto hoyga aad wadaageyseen goorta aad wada nooleydeen, taasoo qeyb ka ah amarka Taageeridda adiga iyo tan caruurtaba. Garsooraha ayaa tani amri kara xataa haddii aadan guriga iska la hayn, ama haddii magacaagu uusan ku qorneyn heshiiska guri. Ka hor in garsooraha uusan ku amrin saygaaga/xaaskaaga in uu guriga ka baxo, garsooraha wuxuu qorshaha ku darsanayaa haddii rabshado ka jiri jireen xiriirkiinna, haddii ay jirto meel kale ee kugu habboon ee aad ku noolaato, haddii ay taasi tahay mid dan u ah carruurta in ay guriga joogaan, iyo xaaladdaada dhaqaale.

Haddii garsooraha uu ogolaado amarka lahaanshaha gaarka ah, saygaaga/xaaskaaga waa in uu ka guuraa oo guriga ka fogaadaa. Haddii assga ama ayadu isku dayo/do in uu yimaado, boliiska ayaad u wici kartaa oo assaga ama ayada waa lagu qabsan karaa. Amarka xakamaynaya qofka iyo amarka lahaanshaha gaarka ah waxaa laga yaabaa in uusan noqon mid ku filan in shaqsi rabsho badan in uu dhaawac kuu geysto. Saygaaga/xaaskaaga horeyba sharciga ayuu u jebinaayey markuu adiga ama carruurtaadaba gacan uu/ay kuu geystey/satay ama ku kadeediyey/sey oo waxaa laga yabaa in uu isu diyaariyey/sey in ay/uu jebiyo/so sharciyo kale asiga/ayada oo dhaawac mar kale kuu geysto. Haddii aad tahay dumar oo xaaladahan ku sugan, hoyga dumarka ee jaaliyaddaada ayaa laga yaabaa in ay tahay halka adiga kuugu badbaado badan ee aad adiga iyo carruurtaadaba aad muddo yar ku noolaan kartaan.

Tagri falka jooji

Haddii adiga jir ama dareen ahaanba saygaaga/xaaskaaga ku xadgudbtay wax baad ka qaban kartaa si aad u joojiso.
Waxaad awoodi kartaa

- : La’taliye kala hadal rabshadaha dabeecaddaada
- ; raadi kooxo caawiya shaqsiyaadka xadgudub ku sameeya saygaaga/xaaskaaga;
- u yeer takhtarkaaga, xarunta macluumaadka jaaliyadda, xarunta caafimaadka jaaliyadda, Khatka Taageeridda Dhibbanaha ama adeeg latalinta si aad u hesho talefoon lambarka kooxaha jaaliyaddaada,
- la hadal Barnaamijka Taageeridda Shaqaalaha ee lataliyaha goobtaada shaqo oo laga yaabo in aad caawinaad ka hesho;
- waxa aad oraneyso iyo waxa aad sameyneyso mas’uuliyaddoodana qaado.

Liiska-warbaahineed ee Degdegta ee Dumarka Dhibbaneyaasha ee Arbushab ee Gacan ka hadal loo geystey (Emergency Checklist for Assaulted Women in Crisis[2]

- Goorta gacan ka hadal laguu geysto, boliiska u yeer. U sheeg in gacan ka hadal laguu geystey.
- Haddii boliiska yimaado waa in ay qofka debmi ku soo oogaan haddii ay aaminsan yihiin in gacan qof qofka kale u geystay.
- Qayli: oo deriska ayaa laga yaabaa in ay boliiska u yeeraan.
- Caruurtaada bar in ay boliista u yeeraan.
- Haddii aad awooddo, carruurta horey u kaxee goorta aad baxeyso.
- Weydii haddii boliiska uu kula tagi karo gurigaaga goor dambe si aad u soo qaadato waxyaabaha aad u baahan tahay.
- Koonto magacaaga ah bangiga ka furo oo qorsheey in warqadda bisha bangiga uu soo diro aan adiga laguu soo dirin.
- Kayd yeelo inta kuu suuragal ah
- Lacag meel u dhigo tagsi iyo sarrif aad talefoonnada dibadda ku yaalla ku wacato.
- Qorshee irridaha aad degdeg uga bixi karto.
- Hayso mar walba lamabarrada degdegga aad u baahan tahay.
- Guriga saaxiibkaaga/daada dhigo dhar, furaha guriga, furaha baabuurka, lacag, iwm.

- **Haddii ay noqoto in aad guriga si dhaqso ah uga baxdo, isku day in aad horey u qaadato**
- Furaha dheeraadka ah ee gaariga ama guriga
- basaboorkaaga, warqadaha dhalashada, warqadaha socdaalka (immigration), kaarka caafimaadka, lamabarka soshal sekiyuuratiga,
- warqadda daawada aad ku gadaneyso iyo daawooyinkaaga,
- boorsadaada oo horeyba diyaarka kuugu ahayd, haddii ay suurto gal tahay
- caruurta waxyaabaha ay ku ciyaarto iyo waxyaabaha ay u baahana yihiin.

- Macluumaad intaa ka sii dheer oo ku saabsan qorshaha badbaada, eeg: *www.shelternet.ca/en/women/making-a-safety-plan* ama *www.projectbluesky.ca/english/generalinfo/safetyplan.html* [2]Tilmaamaha Adeegyada Dumarka Gacan ka hadalka loo geystey ee Ontario (Guide to Services for Assaulted Women in Ontario, 1998

IV. HELIDDA MACLUUMAAD DHEERAAD AH EE KU SAABSAN

ARRIMAHA DADKA ASSAL AHAAN KA SOO JEEDAAN DHULKAN

Buugyaraha sharciga dadka dhulkan ka soo jeeda assal ahaan uu daabacay Carswell.
Ka fiiri maktabada xaafadaada ama Friendship Centre. Si aad uga dalbato Carswell, bilaash ku wac 1-800-387-5164 ama booqo shabakadda www.carswell.com,

---

XEERKA MASRUUFKA ILMAHA

Xeerka Masruufka Ilmaha ee Federaalka: Wac 1-888-373-2222 ama booqo: *www.canada.justice.gc.ca* (Xulo “Programs and Initiatives” and "Child Support")

Xeer GOBOLEEDKA Masruufka Ilmaha: Waxaad maxkamadda qoyska ee xaafaddaada ka heli kartaa buug yare ka hadlaya ama booqo bogga internetka ee Xafiiska Xeer Ilaaliya Guud: *www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca* (Xulo “Family Justice” iyo “Child Support Guidelines Information”).

CARRUURTA

Macluumaad dheeri ah iyo/ama caawinaadda carruurta oo laga yaabo in lagu soo xadgudbay, xarunta daryeelka carruurta(children's aid society) ee xaafaddaada ayaa laga yaabaa in ay ku caawin.karaan Talefoon lambarkooda ka eeg bogagga cad (white pages) ee hagaha buuggaaga talefoonnada adiga hoos eegaya “Children’s Aid Society” ama la xiriir talefoonnada xaaladda deg dega ah ee ku qoran buuga talefoonka boggiisa kore. Shabakadda **The Ontario Association of Children’s Aid Societies’** *www.oacas.org* sidoo kale waxaad boggooda ka heleysaa macluumaad sida aad ula xiriir lahayd xarumaha hay’adaha daryeelka carruurta Ontario (chilidren's aid societies ee Ontario) dhammaan.

Xafiiska Qareenka Caruurta (Office of the Children’s Lawyer): Wac 416-314-8000 ama booqo bogga internetka ee Xafiiska Xeer Ilaaliya Guud oo ah: *www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca* (Xulo “Office and Agencies” iyo “Office of the Children’s Lawyer”).

Haddii cunug laga kaxeeyo meel ka baxsan Canada adiga oo aan fasax lagaa haysan:

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, Maamulka Dhexe ee Ontario ee Xeerka Hague (Hague Convention) ee quseeya Af-duubka Caalamiga ah Carruurta. Wac 416-240-2411.

Af-duubka Caruurta Caalamiga:

Qoraal loogu tala galey Waalidiinta. Si aad u dalbato, wac Waaxda Arrimaha Dibadda iyo Ganacsiga Caalamiga (International Trade), Arrimaha Qunsuliyadeed ka wac 1-800-387-3124 ama 1-800-267-6788, ama booqo shabakaddooda oo ah: *www.voyage.gc.ca* (xulo “Publications” iyo “Children’s Issues”).

barnaamijka “our missing children” laga helo Adeegyada Waddanka ee Carruurta la la’yahay (c/o National Missing Children Services): Ontario gudaheeda ka wac qatka bilaashka oo ah 1-877-318-3576 ama Fakis: 613 993-5430. Macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jirto shbakado kale oo internetka oo ku caawinaya, booqo bogga internetka oo ah: *www.ourmissingchildren.gc.ca*

XEERKA QOYSKA

Goobaha Maxkamadda qoyska ee jaaliyaddaada, ka eeg bogagga buluugga ah (blue pages) ee buuggaaga telefoonnada halka ay ku qoran tahay ‘Maxkamado’ (“Courts”) ee dhanka Taxanayaasha hay’adah Dowladda (Index-Government Listengs”. *Booqo shabakadda Xafiiska Xeer Ilaa liyaha Guud oo ah www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca* (xulo “Court Addresses”)

Macluumaad ku saabsan **tallaabooyinka kiiysaska qoyska** iyo tilmaamaha **sida loo buuxiyo foomamka,** booqo shabakadda Xafiiska Xeer Ilaaliya Guud oo ah: *www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca* (xulo “Family Justice” iyo qeybta hoose Daabacaadda Internetka (“Online Publications”) ka xulo Tilmaamaha Hannaanka ee ku habboon dacwaddaada.

Xarumaha Macluumaadka ee Xeerka Qoyska: Faahfaahin ku saabsan adeegyada ay bixiyaan, la xiriir maxkamadda qoyska ee xaafaddaada ama booqo shabakadda Xafiiska Xeer Ilaaliya Guud boggiisa oo ah: *www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca* (xulo “Family Justice" iyo "Family Court Services")

Kulamo Macluumaad ee Waaldiinta ayaa waxaa laga bixiyaa Maxkamadda Qoyska ee Maxkamadda Sare ee Caddaaladda iyo Maxkamadaha qoyska ee Toronto. Kulummadan waxay looga hadlaa kala go'ida iyo furniinka saameynta ay ku yeeshaan caruurta waana.

bilaash lacag ahaan ah. Goobo badan ee lagu qabto iyo macluumaad dheeraad ah booqo shabakadda Xafiiska Xeer Ilaaliya Guud oo ah: *www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca* (xulo "Caddaaladda Qoyska ("Family Justice") iyo "Adeegyada Maxkamadda Qoyska" ("Family Court Services")

WADDOOYIN KALA LEEXDEEN (Separate Ways) cajalad muuqaal ah ee ku saabsan kala go'a iyo furriinka ayaad ka heleysaa maxkamadda qoyska iyo maktabadaha shacabka.

HORE U SOCOSHO (MOVING FORWARD) Cajal muuqaalah ayaa la soconaya lammaaneyaal ku dhex jira xiisaha xal u helidda arrimaha khilaafka sharciyeed ee qoyskooda, isla markaana waalidnimmadooda, arrimaha taagan wuxuuna macnaynayaa fursado xal sida kalfadhi kiisha iyo dhexdhexaadin. Cajalka muuqaalka ah waxaa laga heli karaa maxkamadaha qoyska iyo maktabadaha shacabka

XAGGEE AYAAN KU SUGANAHAY:Hagid cunug ee Kala Tegid iyo Furriin waxaa laga helaa dhammaan maxkamadaha qoyska iyo Daabacaadyada Ontario (Ontario Publications). Booqo shabakadda www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca (xulo "Caddaaladda Qoyska" iyo "Daabacaasyada Internetka") ("Family Justice" and "Online Publications")

Si aad u hesho buugyareyaal xeerka qoyska iyo qodobbo sharciyeed kale la xiriir{

Tarbiyaynta Sharcica ee Bulshada ee Ontario
119 Spadina Avenue, Suite 600
Toronto ON M5V 2L1
Tel.{ 416-408-4420
Fax: 416-408-4424
Shabakadda: www.cleo.on.ca
(e-mail: cleo@cleo.on.ca)

Macluumaad dheeraad ah ee sharciga furriinka lkala xiriir:

Waaxda Caddaaladda Canada
284 Wellington Street
Ottawa ON K1A 0H8
Tel: 1-800-373-2222
Shabakadda : www.canada.justice.gc.ca

Bishii January 2005, qoraal aan rasmi ahayn ee soo jeedin talooyin xeerarka masruufka **say-xaas**, ayaa lagu soo saaray laguna daabacay shbakadda dowladda dhexe. Macluumaad dheeraad ah, fiiri www.justice.gc.ca/en/dept/pub/spousal/index.html .

Daabacaad taxan ee xeerka qoyska, gacan ka hadal loo geysto dumar iyo carruur, iyo moduucyo kale, la xiriir

Ururka Qaranka ee Dumarka iyo Sharciga (National Association of Women and the Law)
1066 Somerset Street West, Suite 1066
Ottawa ON

K1Y 4T3
Tel.:613-241-7570
Fax: 613-241-4657
Shabakadda: www.nawl.ca
(e-mail info@nawl.ca)

XAFIISKA MAS'UULIYADA QOYSKA

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, u qor Xafiiska Mas'uuliyada Qoyska (Family Responsibility Office (FRO) :

Xafiiska Mas'uuliyadda qoyska
P.O. Box 220Downsview ON M3M 3A3
Fax: 416-240-2401

Si aad u hesho macluumaad guud ee ku saabsan FRO iyo helitaanka foomamka ayo isticmaasho FRO, booqo shabakadda FRO:
www.theFRO.ca

The Confirmation of Assignment (English form number 006-3006, French form numberr 006-3007) waxaad ka heli kartaa: *www.forms.ssb.gov.on.ca*).

Si aad wakiil ula hadasho, wac:

Telefoon: 416-326-1817 (Toronto iyo nawaaxigeeda)
khatka bilaashka oo ah: 1-800-267-4330
TTY Toronto iyo nawaaxigeeda: 416-240-2414
TTY khatka bilaashka oo ah: 1-866-545-0083

Si aad FRO lacagta ugu dirto, u dir:

The Director, Family Responsibility Office
P.O. Box 2204, Station P
Toronto ON
M5S 3E9

Waxaa muhiim ah: In aad xusuusato in aad magacaaga hore iyo kan dambe ku daabacdo fart waaweyn raaciso lambarka kiiska ee FRO oo aad ku qorto jeegga ama nooca (money order) hortiisa.

Qatka talefoonada 24ka saac, halkaasoo aad ka heli karto macluumaad ku saabsan waxyaabaha dhaqdhaqaaqyadii ugu dambeeyay ee kiiskaaga iyo si aad jawaabo ugu hesho su'aalaha guud ee ku saabsan FRO, wac:

Talefoon: 416-326-1818 (Toronto iyo nawaaxigeeda)
khatka bilaashka oo ah: 1-800-267-7263

Si aad Waaxda Sharciga FRO (FRO Legal Department) ugu soo dirto warqadaha maxkamadda, u soo dir:

Family Responsibility Office
Legal Services
1201 Wilson Avenue
Bldg B, 5th Floor
Downsview ON M3M 1J8
ama fax: 416-240-2402

Macluumaad dheeraad ah ee xukuummadaha dhexdooda ee ku saabsan ammarrada masruufka, marka uu qof ku nool yahay Ontario meel ka baxsan la xiriir:

Family Responsibility Office
ISO Unit
PO Box 640
Downsview ON
M3M ON 3A3 3A3
Talefoon: 416-240-2410 (Toronto iyo nawaaxigeeda) Khatka bilaashka: 1-800-463-3533
TTY Toronto iyo agagaaraheeda: 416-240-2414
TTY khatka bilaashka ah: 1-866-545-0083
Qeybta ISO Fakis: 416-240-2405

Dhammaan foomamka ammarrada masruufka ee xukummada ka dhexeeya waxaad ka heleysaa bogga internetka ee FRO: *www.theFRO.ca*.

HELITAANKA QAREEN

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada ay bixiyaan Law Society of Upper Canada (LSUC), booqo boggooda internetka: *www.lsuc.on.ca*

> **Adeega Qareen u Faridda (Lawyer Referral Service)** waxay ku siin doontaa magaca qareen oo ka howl gala xeerka qoyska ee xaafaddaada u dhow. Qareenkaas wuxuu bixin doonaa nus saac oo latashi lacag la'aan ah. Talefoon lambarka adeegaan waa 1-900-565-4577. Qiimo go'an oo ah $6.00 ee isticmaalka adeegan ayaad ku arki doontaa biilkaaga talefoonka.
>
> LSUC ayaa gorfayn doonta **dacwaddaada ku saabsan sida uu qareen u qabtay kiiskaaga:**
> Talefoon: 416-947-3310 (Toronto iyo nawaaxigeeda)
> khatka bilaashka oo ah: 1-800-4424
> bogga Internetka: *www.lsuc.on.ca* (xulo "For the Public" iyo "Complaints")
>
> Macluumaad sida aad **uga murmi lahayd qarashka qareenka (**ujrooyinka): booqo bogga internetka ee LSUC: *www.lsuc.on.ca* (xulo "For the Public", "Complaints" iyo "Your Lawyer's Bill Too- High?").

Caawimaad xagga kharashka qareenka (Legal Aid): Fadlan la soo xiriir xafiiska (legal aid) ee bulshadaada si aad u aragto haddii ay ku caawin karaan. Macluumaad dheeraad ah, ka eeg buugga telefoonka (bogagga cad) "Legal Aid" hoosteeda ama booqo bogga internetka ah: *www.legalaid.on.ca*

DHEXDHEXAADIN (MEDIATION)

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhexdhexaadinta iyo helista dhexdhexaadiye qoyska, la xiriir:

Ontario Association for Family Mediation
528 Victoria Street North
Kitchener, ON N2H 5G1
Tel.: 1-(800) 989-3025
Fax: 519-585-0504
Bogga Internetka: *www.oafm.on.ca*
(email *oafm@oafm.on.ca*)

Adeegyada dhexdhexaadinta Qoyska waxaa laga helaa Maxkamadda Qoyska ee Maxkamadda Sare ee Cadaaladda. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, sida goobaha ay ku taallo Maxkamadda Qoyska, booqo bogga internetka ee Xafiiska Xeer Ilaaliya Guud www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca (xulo "Family Justice" iyo "Family Court Services"

BOOQASHADA KORMEERAN (SUPERVISED ACCESS) Macluumaad ku saabsan **Barnaamijka Booqashada Kormeeran** ee Xafiiska Xeer Ilaaliya Guud, la xariir maxkamadda qoyska ee xaafaddaada ama booqo bogga internetka ee Xeer Ilaaliyaha Guud *www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca*

GACAN KA HADAL QOYS;

Khatka Haweenka gacan ka hadal loo geystey

(Assaulted Women's Helpline): Waa adeeg talefoon oo ka shaqeeya gobolka oo dhan 24 saacadood maalintii, toddoba maalmood toddobaadki ee loogu talagey dadka dhibaateysan . Lataliyayaal u tababaran ayaa ku caawinaya oo ku siinaya fursado aad wax ku kala dooran karto, kuna siin doona macluumaad ku saabsan taageerada aad ka heli karto degmada aad deggan tahay sida hoy iyo xarumaha dadka la dhibaateeyey oo si dhaqso ah kaaga caawin doona qorshe lagugu badbaadin karayo. Tarjumayaal ku hadla ilaa 150 luqadood ayaa diyaar ah oo u jawaabi doona kuwa soo waca. Wac 1-866-863-0511 ama, Toronto agagaarkeeda degan tahay soo wac 416-863-0511. TTY 1-866-863-7868.

Khadka Dadka Dhibaateysan ee ku hadla Luqadda -Faransiiska (French-Language Crisis Line): Adeeggyada khatka talefoonka bilaashka ah ee loogu tala galey haweenka afka Faransiiska ku hadla ee rabshadeeyey. Wac 1-877-336-2433 (24 saacadood maalintii, 7 maalmood toddobaadkii).

Shelternet: Boggan internetka waxaad ka heleysaa macluumaad ku saabsan hoyga haweenka xadgudubka lagu sameyey ee Canada oo dhan. Sidoo kale bogga waxaa kaloo aad ka heleysaa macluumaad guud iyo ilaha caawinaad ee loogu tala galey haweenka rabshadaha la kulma. Waxay leedahay qeyb gooni ah oo loogu tala galey carruurta iyo dhallinyarada. Bogga wuxuu ku qoran yahay ilaa iyo 10 luqadood (Ingiriis, Faransiis, Isbaanish, Boortaqiis, Boolish, Shiinees, Fiyettnaamiis, Carabi, Faarsi, iyo Bunjaabi). Bogga internetka ka booqo*www.shelternet.ca*.

Tarbiyada Xaaska gacan ka hadal loo geystay (Education Wife Assault) waxaad ka heleysaa macluumaad, oo ay ka mid yihiin daabacaadyo. La xiriir:

215 Spadina Avenue
Suite 220
Toronto ON M5T 2C7
Telefoon.: 416-968-3422
TTY: 416-068-7335
Fax: 416-968-2026

Miyaad la socotaa in dumar xadgudub lagu sameeyo.....Buug-yare Xuquuqda, Tababarka sharciyeed ee bulshada Ontario (CLEO) 1998. Dalbo nuqullo adigoo wacaya416-408-4420 ama booqo bogga shabakadda www.cleonet.ca

Daabacaadyada Dabagalka MetropolitanAction Committee on Violence Against Women and Children (METRAC). Dalbo nuqullo adigoo wacaya 416-392-3135 ama booqo bogga internetka www.metrac.org

---

ADEEGYADA DHIBBANAHA (VICTIM SERVICES) Macluumaad ku saabsan adeegyada dhibbanaha ee uu bixiyo Xafiiska Xeer Ilaaliya Guud, booqo bogga internetka *www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca* (xulo “Victim and Witnesses”) **Khatka**

Taageeridda Dhibbanaha (The Victim Support Line): Khatka Taageeridda Dhibbanaha waa khat talefoon oo bilaash ah oo ka shaqeeya gobollada oo idil, khatka talefoonka macluumaadka waxaad ka heleysaa adeegyo kala duwan oo loogu tala galey dhibbanayaasha dembiga loo geystey ee ku hadla af-Ingiriis iyo af-Faransiis.

Talefoon:416-314-2447 (Toronto iyo nawaaxigeeda)
Khatka talefoonka bilaashka ah: 1-888-579-2888

Lambarrada telefoon, cinwaanada iyo bogagga internetka waxay ahaayeen kuwo shaqeynayay goorta daabacaadda waana is beddeli karaan.

XASUUS QOR

XASUUS QOR

XASUUS QOR

XASUUS QOR